# JAMHUURIYADA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILADDA

# XEERKA SAHAMINTA IYO SOO SAARISTA SHIDAALKA

## XEER LR: 95/2021

GOLAHA WAKIILADA
ARKIFIYADA
J. SOMALILAND

# GOLAHA WAKIILADDU

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:-** | Qodobka **12aad, 75aad, 76aad, 77aad iyo 78aad** ee Dastuurka Qaranka JSL. |
| **Markuu Arkay:-** | Ahmiyadda dhaqaale, siyaasadeed iyo bulsho ee Sahaminta iyo soo saarista shidaalku u leeyihiin horumarka iyo taabbagelinta dhaqaale si dalku isku filnaansho u gaadho. |
| **Markuu ku Qancay:-** | In baahi weyn loo qabo xeer si faah-faahsan u qeexa Shidaalka Dalka sida loo Sahaminayo iyo sida loo saarayo in la helo. |
| **Markuu Arkay:-** | Qabyo-qoraalka Xeerka Sahaminta iyo Soo saarista Shidaalka oo ay Xukuumadu Golaha u soo gudbisay. |
| **Markuu dhageystay:-** | Warbixinta Gudidda Golaha u qaabilsan Kheyraadka Dabiiciga iyo Deegaanka oo Wax ka badal iyo Kaabis ku soo sameysay, sidoo kalena ay Mudanayaasha Golaha Wakiiladdu ka doodeen. |

## WUXUU ANSIXIYAY

## XEERKA SAHAMINTA IYO SOO SAARISTA SHIDAALKA

## XEER LR: 95/2021

## QAYBTA 1AAD

# QODOBO GUUD
## XUBINTA 1AAD
## MABAADI'IDA GUUD

ARKIFIYADA
GOLAHA WAKHILADA J. SOMALILAND

### Qodobka 1aad
### Magaca xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Xeerka Sahaminta iyo soo Saarista Shidaalka Xeer Lr. 95/2021.

### Qodobka 2aad
### Erey-Bixin

Xeerkan, hadii aanu nuxurku si kale u sheegin:-

**"Xeer"** waxaa loola jeedaa Xeerka Sahaminta Shidaalka iyo Soo-saaristiisa Xeer Lr.95/2021

**"Xubin"** waxaa loola jeedaa hay'ad kasta oo sharci ama jismiyeed oo halkan loogu yeedhay sidii shirkad hooyada ah, taasoo si toos ama si dadban hubisa ruqsadle ama qandaraasle, ama hay'ad kasta oo sharci ku dhisan oo uu si toos ama si dadban gacanta ugu hayso shirkada hooyada ah, ama shirkad haysata saamiyo ama lahaansho kale oo sharci ku dhisan oo sita wadarta in ka badan 50% ee xuquuqaha cod bixinta ee la isiticimaalo kulanka guud, ama shirkad gaar ahaaneed oo si dadban gacanta ugu hayso shirkad ama shirkado, hadii tiro shirkada ah la cayimi karo, oo ka farcamaya shirkada hooyada ah ama shirkado ama ku dhamaaanayo shirkad gaar ah oo xidhiidh la leh shirkad kasta, marka laga reebo shirkada hooyada ah ama shirkado si toos ah ay ugu hayso hal shirkad ama shirkado badan oo hore ugu jirey tirada.

**"Goobta Heshiiska"** Waxaa loola jeedaa qayb kasta oo ka mid xuduuda ama lakabka hoose ee Dawladda kasoo lagu galay dushiisa sahaminta iyo soo saarista heshiiska Sahaminta iyo wadaaga wax soo saarka, oo ay shuruud u tahay wax ka bedel kasta oo ku yimaada gobtaas in uu waafaq-sanaado qodobada ka bixitaanka ee ku dhigan xeerkan iyo heshiiska sahaminta iyo wadaagida wax soos aarka;

**"Baloog"** Waxaa loo jeedaa meesha la kala qaybin karo ee ku taala oogada sare ama joqoraafi ahaan lagu qeexay xeerkan ama xeer-hoosaadyo waafaqsan xeerkan si loogu isticimaalo tixraac juquraafi ahaaneed;

"**Godan-badeedka berriga xiga**" Waxaa loola jeedaa lakabka hoose ee badda iyo ciidda hoose ee goobaha maraakiibta ee fidsan kana baxsan xuduuda Dawladda (oo ay ku jirto xuduud badeedka) sida kuqeexan Dastuurka iyo xeerka dhaqangalka ah iyo iyadoo loo eegayo mabaadiida uu aasaasay xeerka caalamiga ah;

**"Qandaraasle"** waxaa loola jeedaa hay'ad sharci ku dhisan oo la gashay heshiis sahamin iyo wadaagis wax soo saaris dawlada;

"Sahamin" Waxaa loola jeedaa hawlaha looga goleeyahay in lagu soo saaro shidaalka oo ay ku jirto hawlaha baadhiseed iyadoo ay la socoto qodida sahaminta ceelasha oo halkan loogu yeedho ceelasha qiimaynta iyo hawlaha la xidhidha;

**"Agab"** Waxaa loola jeedaa hal ama in ka badan oo ah qalab rakiban, wershed iyo qalab, ama qaab loogu talo galay hawlaha shidaalka oo ay ka mid tahay gaadiidka;

**"Dhulka hoose"** Waxaa loolajeedaa hal ama in ka badan oo qayb ka ah qorshaha horumarinta dhulka hoose;

**"Xukuumad"** Waxaa loola jeedaa Xukuumada Somaliland;

**"Ruqsad"** Waxaa loola jeedaa xuquuqaha ay siisay xukuumadu hay'ada u qalanta si ay u fuliso hawlo cayiman oo shidaal si waafaqsan xeerkan;

**"Ruqsadle"** Waxaa loola jeedaa qof kasta, shaqsi ahaan ama koox ahaan kuwaasoo loo siiyey ruqsad hawlo shidaal si ku waafaqsan xeerkan;

**"Wasiir"** Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta.

**"Gaaska Dabiiciga ah"** Waxaa loola jeedaa dhamaan haydra-kaarboonka Gaaska ah ee ku guda jirta cadaadiska deegaanka caadiga ah oo uu ku jiro gaaska qoyan, gaasta qalalan iyo gaasta hadhaaga ah kadib marka la soo saaro dareeraha ah haydro kaarbonka ee ka yimid gaasta qoyan;

**"Hawl-wadeen"** Waxaa looga jeedaa qof kasta o fulinaya hawl maalmeedka hawsha shidaalka isaga oo metelaya ruqsadlaha ama qandaraaslaha;

**"Shidaal"** Waxaa loola jeedaa saliid caydhiin, gaaska dabiiciga ah ama dareere kasta oo dabiici ah ama gaaska haydara kaarboona ee ku jira ciida hoose sidoo kalena iyo walxaha kala ee la soo saaray iyadoo ay la socoto haydra-kaarboonkaas;

**"Hawlaha shidaalka"** waxa loo jeedaa qorshaynta, diyaar garaynta, rakibida iyo fulinta dhamaan hawlaha la xidhidha kaydka shidaalka oo ay ku jirta baadhida, sahaminta, horumarinta, soo saarista, qaadida iyo sifaynta;

**"Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka"** waxa looga jeedaa heshiis ay galeen dawlada iyo qandaraas le si ay ugu fuliyaaan hawl cayiman oo shidaal si waafaqsan xeerkan;

**"Keyd Shidaal"** waxaa loola jeedaa shidaal si dabiici ah oo gaar ah ugu ururay unug jiyoolaji (geological) oo uu xadiday astaamo dhagax, xuduudo qaab dhismeed iyo hirar-dhagax (straticgraphic), oogada is haysata, ee u dhaxaysa samaysanka shidaal iyo biyo, ama isugaynta kuwaas, taas dhamaan shidaalka ku sugan meel kasta uu ku hoos uu jiro cadaadis ka dhigay dareere ama gaas;

**"Wax soo saar"** waxa looga jeedaa dhamaan hawlaha la xidhiidha soo saarida keyd shidaal, ooy ka mid tahay horumarinta, gelin (injection), helida hore loo mariyay ee la kobciyay, habaynta iyo bedelida shidaalkii lasoo saaray marka laga reebo hadhaaga la burburiyay, rarida iyo dhamaan shaqooyinka iyo adeegyada kale ee la xidhiidha;

**"Baadhis"** waxa loola jeedaa hawlaha hor dhaca ah ee loo sameeyo si loo qeexo jiritaanka kayd shidaal, iyadoo la isticmaalayo hanaan jiyoologi (geology), midka betroo-fiisicis (petrophysical), dhismaha-dhulk (geophysical), jiyoo-kimisiteriga (geochemical) ama farsamo-dhuleedka (geotechnical), oo ay ku jirto qodida godod dhaadheer balse aanay ku jirin ceelasha sahaminta.

**"Xeer nidaamiye"** Waxa loola jeedaa xeer-nidaamaye loosoo saaray si waafaqsan xeerkan;

**"Qaran"** Waxaa loola jeedaa Qaranka Jamhuuriyadda Soomaaliland;

**"Xuduud"** Waxaa loola jeedaa xuduuda Dawlada ee ku qeexan Dastuurka;

**"Gaadiid"** Waxaa loola jeedaa ku qaadida shidaalka dhuumaha iyo hawlaha la hal maala oo ay ku jiraan dhisida, meelaynta hawlgalka iyo isticmaalka agabka looga gol leeyahay ku rarida laakiin aanay ku jirin ku rarida qayb baaxad weyn oo shidaalka ah, gaadiidka bada ama gaadiid dhul hadii aan si kale oo ka duwan loo sheegin.

**"Kayd qiimayn"** waxaa loo jeedaa hawlaha la qabanayo ka dib marka la helo kayd shidaal, hawlahaas oo ujeedkoodu yahay qeexidda qaabka shidaalka iyo kaydka la helay iyo in la ogaado sida ay ganacsi gal u tahay, waxaana ka mid ah hawlahaas:

**(a)** Ceelal la qodo iyo in la sameeyo shidaal soo Saar tijaabo ah;

(b) Ururinta muunaddo jiyooloji iyo dareere laga oo qaaday kaydka; iyo

(c) In la sameeyo cilmibaadhis iyo sahan lagu helo xog dheeraad ah iyo in la sifeeyo xogtaas;

**"Ceel kayd qiimayneed"** waxaa loola jeedaa, wixii ceel ah ee laga qodo goobta qandaraaska, helitaanka kayd shidaal ka dib, qodaalkaas oo ujeedkiisu yahay in la hubiyo tayada iyo baaxadda shidaalka ee kaydka shidaalka ee la helay;

**"Hanaan-hawleedyada Bahweynta Shidaalka ee ugu Wanaagsan ee La heli karo"** waxaa loola jeedaa hanaan-hawleedyada ugu wanaagsan ee loo aqbalay inuu fiican yahay, badbaado yahay, daahfuran oo wax ku oolna ah marka la samaynayo hawlaha shidaalka, caalamka oo dhamina si isku mid ah u dabiqi karo;

**"Shirkad"** waxaa loola jeedaa hay'ad isku-dhafan ama aan isku dhafnayn oo u jirta si waafaqsan Xeerka Shirkadaha;

**"Saliid caydhiin"** waxaa loo jeedaa dareere dabiici ah oo ah milan noole ka soo jeeda oo laga helo dhulka hoostiisa

**"Soo xidhidda goobta hawsha"** waxaa loola jeedaa ka guuridda, alaab ka raridda iyo ka takhalusidda ama haddii ay khusayso dib-ugu laabashada ceelal, dhuumo, agab, dhismayaal iyo hanti hawlo sahamin iyo soo saaritaan shidaal;

**"Qorshaha xidhitaanka goobta hawsha"** waxaa loola jeedaa xidhmo hawlo ah oo Shirkadu soo jeediso oo la xidhiidha Xeerka Shidaalka oo la qabanayo marka ay istaagto hawlaha shidaal soo saarida, si loo raro ama si kale loogu hawlgalo dhamaan qalabka la rakibay, qalabka shaqada, dhuumaha iyo agabka kale, haday ku yaalaan badda ama beriga kuwaas oo loo dhisay ujeed ah in hawlahaas loo isticmaalo, iyo in dib loogu hagaajiyo dhulkii lagu qaribey hawlahaas.

**"Qorshaha wax soo saar u diyaarinta goobta"** waxaa loola jeedaa qorshe ku lamaan dalabka ruqsadlaha ee ruqsadda wax soo saaru diyaarinta goobta, kaas oo ay ku qoran yihiin hindise faahfaahsan oo ku saabsan dhisidda, samaynta iyo hawlaha dhammaan agabka iyo adeegyada helitaanka kayd shidaal, kala

saaridda shidaalka, kaydintiisa, safrinta shidaalka ee goobta la soo jeediyey in la qodo iyo tababarada iyo shaqaalaynta dadka Somaliland

**"Helitaanka kayd shidaal"** waxaa loola jeedaa in lagu ogaado qodaalka ceelka jiritaanka shidaal aan hore loo ogayn inuu jirey, kaas oo ah mid la soo saari karo isagoo dareere ah laguna cabiri karo qaab ay adeegsadaan bahweynta shidaalku;

**"Qodaal"** waxaa loola jeedaa daloolinta oogada dhulka iyadoo ujeedkuna yahay in la helo kayd shidaal, islamarkaana la ogaado baaxadda kaydkaas, ama in lasoo saaro kaydkaa shidaal ee la helay;

**"Taariikhda dhaqan galka"** waxaa loo jeedaa taariikhda heshiiska wadaagga sahaminta iyo soo saaridda shidaalku uu dhaqangalo sida ku qeexan qoraalka heshiiska wadaagga sahaminta iyo soo saaridda shidaalka (PSA model).

**"Shidaal soo saarid la tabantaabiyey"** waxaa la xidhiidha kor u qaadidda cadaadiska kayda iyadoo lakabka shidaal kaydiyaha ah lagu shubayo/buufinayo biyo, gaas, carbon dioxide ama shay kale.

**"Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka"** waxaa loola jeedaa baadhitaan habaysan oo wacyiga mashruuca la doonayo in la fuliyo ama barnaamij fekerkiisu yahay in la yareeyo ama khafiifiyo saamayntiisa xun, lana kordhiyo saamayntiisa wanaagsan.

**"Qodaal sahamin ah"** waxaa loo jeedaa qodaal ceelal cusub, qodaallo kayd-qiimayn ah, iyo sidoo kale hawlaha iyo isticmaalka agab hawleed iyadoo loo isticmaalayo sahamin ahaan.

**"Mudo sahamineed"** waxaa loola jeedaa mudada loo qoondeeyo in lagu sameeyo hawlaha baadhitaanka;

**"Ceel sahamineed"** waxaa loo jeedaa ceel la qodo inta lagu jiro xiliga hawlaha sahaminta, kaas oo aan ku jirin ceelasha kayd-qiimaynta, ujeedkiisuna yahay bilaabida qoditaanka si sahamin ahaan ah oo lagu baadhayo kayd shidaal oo aan hore qodaal u xaqiijin;

**"Wax soo saar u diyaarin goobeed"** waxaa loola jeedaa qorshaynta, dhisidda iyo rakibidda agabka loogu baahan yahay soo saaridda shidaalka;

**"Holcin"** waxaa loo jeedaa gudbidda shidaalka iyadoo aan loo adeegsanayn kulaylin ama gaas loo isticmaalayo ujeedo faa'iido leh;

**“Wasakhayn”** waxaa loo jeedaa, wixii toos ama si dadban ah ee wax ka bedela qaabka, heerkulka, kiimikada, bayoolojiga, ama shucaac oo ku timaada qayb ka mid ah deegaanka, taas oo ka dhalatay ku qubidda ama ku sii deynta qashin ama jabaq dheer, waxyeeladaas oo saamayn xun ku yeelanaysa isticmaal faa’iido leh oo deegaanka ah ama keenaysa xaaladdo khatar ah oo ku timaada caafimaadka, badbaadada iyo xaalad-wanaagga dadka, xoolaha, duurjoogta iyo xayawaanka biyaha ku dhex nool, dhulka iyo biyaha, dhirta, ama keeni kara xanibaad xaaladeed ama xayiraad la xidhiidha ruqsad lagu bixiyey si waafaqsan Xeerkan;

**“Waxyeelo wasakhayneed”** waxaa loola jeedaa waxyeelo ama khasaare ay sababtay wasakhayn;

**“Ogolaansho wax soo saar”** waxaa loola jeedaa ogolaansho lagu bixiyey si waafaqsan qodobka 32aad.

**“Kaydin”** waxaa loo jeedaa in meel lagu hayo laakiin aanay ku jirin meel ku hakin caadi ah oo dhacda xiliga safrinta.

**“Sii deynta gaasta**” waxaa loola jeedaa ku sii deynta gaasta ee hawada sare lagu sii daayo;

**“Qashin”** waxaa loola waxaa ka mid ah wixii shay’yo ah ee loo qeexo qashin ahaan iyo wixii shay’yo ah haddii ay yihiin dareere, adke, gaas ama shucaac ee la tuuro, la sii daayo ama deegaanka loogu faafiyo xaddi, nooc ama qaab keenaya isbedel ku yimaada deegaanka.

## Qodobka 3aad
## Lahaanshaha Khayraadka

dhamaan shidaalka khayraadka dabiiciga ah ee ku jira inta soohdinta Soomaaliland gaadhsiisantahay waa hantida Dawlada waxaana iska leh dawlada Somaliland oo uga wakiila shacabka.Sida waafaqsan Qodobka 12aad ee Dastuurka, mabaadi’ida xeerka caalamiga ah iyo sharciga dhaqan galka ah, iyo iyadoo lagu xadgubaynin xuquuq kasta oo la bixiyey, la siiyey, la helay, la aqoonsaday ama lagu min guuriyey xeerkan, si loo fuliyo hawlo shidaal,

## Qodobka 4aad
## Masuuliyada Lahaanshaha

Dawladu waa inay xaqiijisaa hirgelinta siyaasada shidaalka iyadoo raacaysa xeerkan iyo xeer nidaamiyayaasha waafaqsan iyo xeerarka kale ee dhaqan galka ah.

Wasiirka ayaana Masuul ka ah:

**(1)** Nidaaminta, baadhista shidaalka iyo maamulida khayraadka shidaalka isagoo uga wakiil ah Dawladda, waana inuu la yimaadaa xeerar cusub ama kuwo dib loo eegayo hadba sidii loogu baahan yahay.

**(2)** Bixinta rukhsadaha iyo gelida heshiisyada sahaminta iyo wadaagista wax soo saarista isagoo metelaya Dawladda si waafaqsan xeerkan,

**(3)** Dabagalka hirgelinta sharciga iyo waajibaadayada heshiisyada,

**(4)** Isku xidhida wasaaradaha kale si ay u hirgeliyaan kormeerka uu siiyey xeer dhaqan gal ahi.

**(5)** Uga warbixinta Madaxwaynaha iyo Gollaha Wasiirada wixii ku saabsan hawlaha shidaalka si joogto iyo marka ay arin muhiimi ah dhacdo ama hawlaha kale ee loo baahan ayahay in lagu hirgelyo xuquuqaha iyo waajibaadka si waafaqsan siyaasada iyo xeerka dhaqangalka ah.

## Qodobka 5aad
## Mabaadii'da maamulka khayraadka shidaalka

**(1)** Ujeedada xeerkan waa inuu u aasaaso hanaan sharci oo ay xukuumadu ku maamulayso khayraadka shidaalka ee hoos yimaada soohdimaha Qaranka.

**(2)** Maamulka khayraadka shidaalka waxaa loo fulinayaa ujeedo muddo dheer leh oo looga faa'iidaynayo dhamaan bulshada Somaliland. Maadaama khayraadka shidaalka ay leedahay dawlada Somaliland iyadoo ka wakiil ah dadkeeda. Waa in sida ugu faa'iidada badan loo maamulaa marka sida ugu dhakhsaha badan loo soo saaro, looguna bedelo dhaqaale u saamaxa in loo isiticimaalo si waarta dhaqaalaha, kaasoo wax ku soo biirinaya daryeelaka, shaqada iyo horumarka Dawladda dhexdiisa, iyadoo lagu xisaabtamayo deegaanka, dadka iyo dhinaca sadexaad ee danta ka leh.

**(3)** Maamulka dawlada ee khayraadka shidaalka waa in lagu saleeyaa inuu soo jiito maal geliyeyaal farsamo ahaan u qalma oo leh awood maaliyadeed oo ay ku qabtaan hawlaha shidaalka si loo yareeyo khatartiisa.

**(4)** Hawlgalo kasta oo lagu qabtay si waafaqsan ruqsad, heshiiska wadaagis sahamin iyo wax soo saar ama ogolaansho kale oo ay cid awood u lehi u bixisay si waafaqsan xeerkan, waxaa loo fulinayaa si waafaqsan sharciyada iyo xeer-nidaamiyayasha la xidhiidha ee laga yaabo in loo qoondeeyo iyo hanaan-hawleedyada ugu wanaagsan ee caalamka ee la heli karo ee xaaladdo la garabdhigi karo ee la xidhidha sahaminta iyo soo saarida shidaalkaa, taas oo ay ku jirto soo saaridda aan dabiiciga ahayn (secondary

recovery) iyo ka hor-tegida khasaaraynta shidaalka, si kor loogu qaado helitaanka kama dambaysta ah ee shidaal lagaga heli karo goobta.

**(5)** Hawlaha shidaalka ee taxadarka leh waxaa ku jira in la qaado dhammaan talaabooyinka macquulka ah ee lagu sugayo badbaadada, caafimaadka iyo xaalad-wanaaga dadka ku foogan hawlahaas, iyadoo la ilaalinayo degaanka iyo danaha daneeyayaasha kale, lalana kaashanayo haayadaha shaqada la leh, wuxuuna waafaqsanaan doonaa tilmaamo kasta oo la bixiyey, xadidaadaha la soo rogay ama shuruudaha uu sameeyo Waddanku ee lagu hubinayo, u hogaansanaanta xeerka khuseeya.

Qodobka 6aad

**Mabaadi'ida Doorka Wasiirka Ee Masuuliyadiisa Nidaaminta**

**(1)** Wasiirku waa inuu adeegsadaa mabaadiida daahfurnaanta iyo la xisaabtanka ee masuuliyada nidaamineed, daahfurnaanta waxaa lagu gaadhi karayaa iyadoo si joogto loo baahinayo macluumaadka la xidiidhka hawlaha shidaalka.

**(2)** Wasiirku waa inuu noqdaa dhexdhexaad oo aanu cidna takoorin.

**(3)** Racfaanada maamul ee ka dhanka ah go'aanada uu gaadho wasiirku waxaa dib u eegaya Maxkamada Sare waaxaana loo raacayaa Xeerka Habka Madaniga.

## XUBINTA 2AAD

**Qodobka 7aad**

**Xadka Adeegsiga**

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa hawlaha shidaal ee xuduuda Waddanka Somaliland bad iyo beriba.

**Qodobka 8aad**

**Kudhaqanka Xeerarka**

**(1)** Shuruucda Dawlada, xeer nidaamiyayaasha iyo ogolaanshaha loo helay si waafqasan shuruucdaas iyo xeernidaamiyaasha waa in lagu dabaqaa hawlaha shidaal ee ka socda dalka oo dhan.

**(2)** Haddii aan sharci sheegayn inuu khuseeyo hawlaaha shidaalka ee Godan-baddeedka Beriga Xiga, Golaha Wasiiradu waxay go'aan ay soo saaraan ka dhigi karaan inuu noqdo mid khuseeya ilaa inta aan waxa uu ka kooban yahay aanay ka hor imanayn waajibaadka sharciyada caaalamiga ah.

### Qodobka 9aad
### Ka Qayb Qaadashada Dawladda

**(1)** Dawladdu way ka qayb qaadan kartaa hawlaha shidaalka si waafaqsan xeerkan iyadoo yeelanaysa saami loogu muujinayo ruqsada ama heshiiska sahiminta iyo wadaagista wax soo saarista si waafaqsan xeerkan.

**(2)** iyadoo lagu dhawaaqayo heshiiska sahaminta iyo wadaagista waxa soosaarka si wafaqsan xeerkan, wasiirku wuxuu, marka uu helo ansixinta Golaha Wasiirada iyo baarlamanka, cayimayaa saamiga u badan ee Dawladdu ay yeelanayso si waafaqsan faqrada 1 aad.

**(3)** Marka uu ansixiyo golaha Baarlamaanku shirkada saliideed oo dawladu leedahay, waxaa aasaasi Kara xukuumada. Soo jeedinta golaha Xukuumada waa inay sheegta inuu shidaal ku filan oo ganacsi gala lasoo saaray si uu u siiyo shirkada sees waara oo ay ugu jirto iskeed mudo dheer, waxana ku jiraya inuu qiimeeyo raadadka ka dhalankara samaynta shirkad qaran oo saliideed.

## QAYBTA 2AAD

## GOOBAHA HAWLAHA SHIDAALKA IYO HESHIISKA WADAAGISTA WAX SOOSAARKA

## XUBINTA 1AAD
## GOOBAHA HAWLAHA SHIIDAALKA

### Qodobka 10aad
### Qiimaynta Istiraatijiyada Deegaanka

**(1)** Ka hor intaan la furin goobaha hawlaha shidaalka, Wasiirka Macdanta iyo Tamarta iyo Wasiirka deegaanku waa inay bilaabaan isla markaana isku xidhaan istiraatijiyada qiimaynta deegaanka ee waafaqsan xeerarka dalka iyo kuwa caalamiga ah ee ugu wanaagsan.

**(2)** Istiraatijiyada qiimaynta deegaanka waa in ay ku jiraan qiimaynta raadka hawlaha shidaalka ee ganacsiga, wershadaha iyo deegaanka iyo sidoo kale dhaqaalaha iyo saamaynta bulshada ee ka iman kara hawlaha shidaalka.

**(3)** Wasiirku wuxuu ka dalban karaa hay'ado sharci ku dhisan inay hirgeliyaan istraatijiyada qiimaynta deegaanka, ka hor ama iyada oo shuruud u ah, bixinta ruqsad la bixinayo ama gelida heshiiska sahaminta iyo wax soo saarka si waafaqsan xeerkan. Ugu yaraan Wasiirku wuxuu had iyo jeer dalban karaa in cilmi baadhis dhamaystiran la fuliyo si loo xaqiiqsado fahanka deegaanka ka hor intaan la bilaabin hawlaha shidaalka.

**(4)** Wasiirku waa inuu u gudbiyaa Madaxwaynaha warbixin dhamaystiran oo sheegaysa goobaha laga bilaablayo hawlaha shidaalka iyo raadka qiimaynta ee loo qabtay faqradaaha (1 aad iyo (2) aad.

**(5)** Wasiirku waa inuu dadweynaha gaadhsiiyaa isagoo isticmaalay warbaahinta iyo hababka dhaqameed ee laga tixgeliyo goobahaas marka la bilaabayo hawlaha, waana inuu, gaadhsiiyaa qiimaynta la sameeyey degaan ahaan dadaweynaha, masuuliyiinta deegaanka ee ay saamaynayso, wakaaladaha kale ee Dawladda iyo ururada ay suurto galka tahay inay si gaar ah u danaynayaan arintaas.

**(6)** Dhinacyada danaynaya waxay, mudo aan ka badanayn sagaashan maalmood kadib marka lagu dhawaaqo sida ku cad faqrada (4aad), ugu gudbin karaan Wasiirka qoraal ahaan, fikirkooda ku saabsan hawlaha loogu talagalay shidaalka. Bulshada waa in lala tashadaa, hadii ay fikirkooda ku dhiibtaan af ahaan waa inay qoraan shaqaalaha dawladu. Hadii mudada ay soo jeedinayaan fikirkooda sida ku cad faqradan aan la waafajin, Dawladda waajib kuma aha inuu tix galiyo arimahooda.

**(7)** Fikir kasta iyo faalo lagu helay sida ku cad faqrada 5 aad iyo kuwa ka yimaada baarlamaaka waa in dib loo eegaa lana tixgeliyaa ka hor intaan Golaha Wasiirada go'aan gaadhin, Wasiirkuna aanu ku dhawaaqin in goobtaasi u furantahay hawlaha shidaalka.

**(8)** Haddii ra'yiga iyo feker-soo jeedinta ku qoran farqadda (6) ay yihiin kuwo aqbalaad ah, Wasiirku wuxuu bayaaminayaa in goobtaa loo furo hawlo shidaal.

**(9)** Haddii ra'yiga iyo feker-soo jeedinta ku qoran farqadda (6) ay yihiin kuwo diidmo ah, Wasiirku wuxuu ka baaraandegayaa in goobtaa loo bayaamiyo in loo furo hawlo shidaal iyo in aan loo bayaamin in loo furo hawlo shidaal.

**(10)** Haddii mudada lagu sheegay farqadda (6) dhammaato ka hor inta aan Wasiirku helin wax ra'yi iyo feker-soo jeedin ah, Wasiirku wuxuu bayaaminayaa in goobtaa loo furo hawlo shidaal.

## Qodobka 11aad
## Khariidada Tixraaca

**(1)** Wasiirku waa inuu diyaariyaa khariidada tixraaca ee lagu muujiyey goobaha juquraafiyadeed ee dhulka ee Dawladduna u qaybisay boloogyo u yaal sida ku xusan faqrada (2) aad. Hadii loo baahdana boloogyada waxaa loo sii qaybin karaa hirar-dhagax (Stratigraphically).

(2) Oogada dhulka waa in loo qaybiyaa baloogyo 30 lool oo miridh iyo 30 dhigood oo miridh xajmi ahaan ah, haddii aan goobaha dhulka ee ku dhegan ama duruufo kale sidaa si ka duwan keensan. Qodobkani kuma yeelan karo saameyn xajmiga goobaha la bixiyey ka hor intaanu dhaqan gelin xeerkani.

(3) Goobaha ruqsadaha lagu bixiyay ama heshiiska sahaminta iyo wadaagida wax soo saarku waa in la qeexaa sida ay juquraafi ahaan isugu xidhan yihiin. Tixraaca baloog ee ku xidhan goobta la bixiyey waa inay u shaqaysaa oo keliya sidii tuse halka qaybta ugu muhiimsan ee goobta laga hadlayaa ku taalo. Goobta la bixiyey waxay ka koobnaan kartaa hal ama in ka badan oo boloog ama qaybo boloogyo ah.

(4) Wax ka bedel lagu sameeyey tixraaca balooga ma saamaynayso xajmiga goobaha lagu bixiyay heshiiska sahaminta iyo wadaaga wax soo saarka ee dhaqan galka ah marka xeerkan la ansixiyo. Marka laga reebo tixraaca boloogyada.

(5) Faah-faahinta, xadaynta, baloogyada iyo sawirada tixraaca khariirada si waafaqasan qodobkan waxa lagu tilmaami karaa xeer-nidaamiye.

### Qodobka 12aad
### Kala qaybinta goobaha heshiiska

Wasiirku waxaa uu codsi ka yimi qandaraaslaha, iyadoo loo hogaamsamayo habraacayada lagu qeexay xeer nidaamiyayaasha, ansixinayaa in qayb goobta heshiiska ka mida la qaybiyo, gaarna loogu bixiyo heshiis sahamin iyo wadaagis wax soo Saar.

## XUBINTA 2AAD
## BAADHISTA

### Qodobka 13aad
### Ruqsadaha sahanka hordhaca ah

(1) Ka dib marka goob loo furo hawlaha shidaalka, codsiga ka dib, Wasiirku wuxuu shirkada u qalanta siin karaa ruqsad sahan hordhac ah oo ku cayiman goob qeexan oo xuduudka waddanka gudihiisa ah ama Godan-badda Beriga xiga si waafqsan xeerkan iyo xeernidaamiyeyaasha isaga waafaqsan.

(2) Goobta qeexan ee faqrada (1) kuma jiraan goobaha heshiiska ilaa ogolaansho qoraal ah laga helo qandaraaslaha.

(3) Dalabka ruqsad sahan hordhac ah waxaa loo samayn doonaa hanaanka uu qeexo xeer-nidaamiye, waxaana la raacinayaa kharashka dalabka ruqsadda ee loo qoondeeyey.

(4) Wasiirku wuxuu, ka dib marka dalab loo sameeyo ogolaansho sahan hordhac ah si waafaqsan Qodobka 14, ogolaansho u bixin doonaa sagaashan maalmood gudahood oo ka bilaabmata marka uu helo dalabka, qaabka iyo shuruudaha bixinta ogolaanshahaas waxaa qeexi doona xeer-nidaamiye.

(5) Iyadoo loo hogaansamayo qodobka 16, ruqsada sahaminta hordhaca ah waa inaanay noqon mid cid u gaar ah si Wasiirku u siin karo ruqsada sahan hordhac ah codsade kasta oo kale oo doonaya dhulka la qeexay ee la bixiyey.

(6) Ruqsada sahaminta hordhaca ah waxaa la bixinayaa muddo ilaa 2 sanadood ah.

(7) Ruqsada sahaminta hordhaca ah ma bixinayso xuquuq mudnaan gaar ah si loogu galo heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax soo saarka.

(8) Wasiirku waxaa uu ku qeexi karaa xeer-nidaamiyeyaal, la xidhiidha habraacayada codsiga, jaangooyada iyo shuruudaha ruqsada sahaminta hordhaca ah iyo bixinta ajuurada codsiyada iyo ta sanadlaha ah.

(9) Ogolaansho ruqsad sahan hordhac ah waxaa ku qornaan doona:-

(a) Taariikhda la bixiyey ogolaanshaha;

(b) Goobta uu ogolaanshuhu khuseeyo;

(d) Shuruudaha ogolaanshaha lagu bixiyey; iyo

(e) Mudada xog-xejinta ee xogaha la ururiyey.

(10) Waxaa shardi u noqonaysa ogolaasho kasta oo sahan hordhac ah in ogolaansho haystuhu uu nuqul xogta la ururiyey ah u siin doono Wasiirka si lacag la'aan ah.

(11) Wasiirku wuxuu dhammaan hawlaha sahanka hordhaca ah ku baahin doonaa luuqadda waddanka iyo saxaafadda waddanka, goobta ogolaanshaha loo bixiyeyna waa inuu ka jiraa xafiis wasaaraddu leedahay ama qof lala xidhiidho oo dadweynuhu xog ka heli karaan ama cabasho u gudbin karaan

(12) Iyadoo ku salaysan Xeerkan, ogolaansho sahan hordhac ah wuxuu shaqayn doonaa mudo afar iyo labaatan bilood ah oo ka bilaabanaysa taariikhdii la bixiyey, ilaa haddii sidaa si ka duwan ay ku timaado ka noqosho heshiis goobeed ama la noqosho sida ay dhigayaan qodobada 23 iyo 65.

## Qodobka 14aad
## Ruqsad Baadhis Gaar ahaaneed

(1) Iyadoo ay shardi tahay in Wasiirku u arko inay lagama maarmaan u tahay si loo aasaso aasaas ganacsi, si baadhitaanku uga dhaco dhulkaas gudihiisa, Wasiirku wuxuu ka go'an gaadhi karaa habka tartanka qandaraaska furan ee

lagu bixinayo ruqsada baadhista gaarka ah. Habka tartanka furan waxaa loo fulinayaa daah-furnan lagu tilmaamay xeer nidaamiyayaal.

**(2)** Gaarnimada lagu bixiyey sida waafqsan faqrada (1aad) waa inaanu ka badan laba sanadood, waxaanay ku kooban tahay oo ku jira habab baadhis la mid ah.

**(3)** Qodobada 14(4) aad iyo 15 (5) aad waxaa loo adeegsanayaa ruqsadaha lagu bixiyey baadhis si waafqsan qaybtan.

## XUBINTA 3AAD
## HESHIISYADA SAHAMINTA IYO WADAAGISTA WAX SOO SAARKA

### Qodobka 15aad
### Ku dhawaaqista Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka

**(1)** Wasiirku wuxuu ugu baaqi karaa cid kasta oo danaynaysa inay ka qayb qaataan wareega tartanka Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka ee dhamaan ama qayb ahaan goobaha loo furay hawlaha shidaalka si waafaqsan qodobka 12aad. Ku dhawaaqistu waa inay cayintaa shuruudaha iyo hanaanka lagu dooranayo qandaraaslayaasha iyo siday hawl-wadeenadu u kala horeeyaan. Codsadayaashu waa inay ugu yaraan leeyihiin awooda maaliyadeed iyo kuwa farsamo oo ay ku fulinayaan waajibaadyada shaqo.

**(2)** Wasiirku wuxuu ku qeexi karaa ku dhawaaqista si waafqsan faqrada (1) shuruudo gaar ah oo dheeraad ah ama shuruudo ku haboon wareega dadka ama goob khaas ah.

**(3)** Baaqa waa in lagu daabacaa faafinta rasmiga, iyo qaybaha kale ee warbaahinta ee gudaha iyo dibada. Ku dhawaaqistu waa in ugu yaraan si caam loo sameeyaa lix bilood ka hor intaanu dhicin codsigu. Shuruudaha lagu dhawaaqayo codsiga waa inaan la diidin ilaa Goalaha Wasiiradu uu ka gaadho go'aan arintaas kasoo horjeeda.

**(4)** Hadii hore loogu baaqay goob si waafaqsan faqradaha (1) ilaa (3) oo aan loo helin wax codsiyo ah Wasiirkuna aanu ogayn arin kasta oo cusub oo si weyn u saamaynaya soo jiidashada goobahaas, Wasiirku waxaa uu la furi karaa wada xaajood toos ah, shirkado muujinaya danayn inay ku galaan heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ee goobta la cayimay.

**(5)** Ka hor intaanu Wasiirku la bilaabin wada xaajood toos ah dhinaca danaynaya sida waafaqsan faqrada (4) aad, waa inuu ku dhawaaqaa ku talagalka inu si toos ah ula galo wada xajood. Ku dhawaaqista waa in loo raacaa shuruudaha ku cad

faqrada (1aad) ilaa (4aad) marka laga reebo mudada ugu yar ee codsigu ku dhacayaa inay tahay 3 bilood.

**(6)** Hadii si waafaqsan farqada (4) aad aan codsiyo loo keenin, Wasiirku waxaa uu dhamaystiri karaa wada xaajood tooska ah ee codsadaha. Habka iyo shuruudaha ku qeexan xeerkan ee ku saabsan goobaha lagu bixiyey ruqsado tartarn furan, waa in si la mida loogu dabaqaa iyo ilaa xadka wada xaajood toos ahi suurta gal yahay.

**(7)** Golaha Wasiirada ayaa bixinaya xuquuq gaar ah oo Sahamineed iyo wax soo Saar iyaga oo ku caddaynaya heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ee lala galay qandaraaslaha.

**(8)** Wasiirka ayaa u xilsaaran Dawladda wadahadalada/gorgortanka gelida heshiisyadda sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka oo ku kooban noocyada laga wada hadli karo si waaafaqsan xeerkan iyo xeer nidaamiyaassha ka farcama.

## Qodobka 16aad
## Ogolaansho Siin

Cidaan Dawladda ahayni Kama samayn karto hawlo shidaal, marka laga reebo si waafaqsan xeerka dhaqangalka ah iyo shuruudaha la socda ruqasada ama heshiiska sahaminta iyo wadaaga wax soo saarka.

## Qodobka 17aad
## Codsiyada heshiiska saamiyadda

**(1)** Iyadoon lagu xad-gudbayn xeerkan, qof kasta oo isku daya inuu soo codsado heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka waa inuu u soo gubiyaa codsi Wasiirka sida waafaqsan ee uu qeexayo xeer-hoosaadku iyo habka tartanka furan ee lagu sheegay ku dhawaaqista soo gudbinta codsiyada iyo xeernidaamiyaasha.

**(2)** Codsaduhu waa inuu bixiyaa ajuurada codsiga ee lagu sheegay soo gudbinta codisiyada maalinta u dambaysa ee dhicida codsiga. Ajuurada codisigu waa inay dabooshaaa kharashka dawladu gashay si ay u qiimayso codsiga, oo ay ku jirto kharashka kirada khabiirka ka caawinaya qiimaynta.

**(3)** Kadib taariikhda la soo gebagbeeyo soo gudbinta codsiga heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka. Wasiirku waa inuu sii wadaa qiimaynta una gudbiyaan si ay u ansixiyaan Golaha Wasiiradu codsadaha u qalma in la siiyo goobta haduu jiro.

**(4)** Heshiis iskaashi oo ay galeen shirkado dhawr ah oo loogu talagalay in lagu soo gudbiyo codsi caam ah oo ku saabsan heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax soo saarka waxaa loo gudbinayaa Wasiirka. Wasiirku wakhti kasta wuxuu awood buuxda u leeyahay wax ka badalka heshiiska iskaashi si uu hubiyo in heshiiyadaasi waafaqsan yihiin ama la jaan- qaadayaan xeerka Waddanka ee khuseeya iyo habka heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax soo saarka.

## Qodobka18aad
## Heshiiska qandaraasyada

**(1)** Wasiirku iyadoo ay ku xidhantahay shuruud dib laga sheegi doono, wuxuu bixin karaa isla markaana la gali karaa heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka Qandaraasle ama koox qandaraas layaala. Goobta heshiiska waa in loo sheegaa si waafaqsan qodobka 17 faqradiisa 3 aad.

**(2)** Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka waa inuu ka koobnaadaa laba weji:-

**a.** Wejiga Sahaminta oo aan ka badnayn 10 sanadood;

**b.** Wejiga soo saarka oo aan ka badnayn 30 sanadood.

**(3)** Wejiga Sahaminta waxaa loo qaybinayaa wejiga bilowga ah ee Sahaminta iyo hal xili ama in ka badan oo la kordhiyay.

**(4)** Marka uu codsado qandaraasluhu, Wasiirku wuxuu kordhin karaa heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka mudada ku cad faqrada (2) aad (a) haddii aanu si kale u ansixin Wasiirku, codsiyada ku saabsan kordhinta waa in la soo gudbiyaa mudo ah 3 bilood ka hor inta aan wejiga Sahamintu dhicin, codsigana waxaa la soo raacinayaa ajuurada lacageed ee khusaysa, ee uu qeexayo xeer-nidaamiye.

**(5)** Marka sababo gaar ahi sidaa keenaan, Wasiirku wuxuu codsi ku saabsan kordhinta heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka mudada dheeriga ah ee lagu sheegay **farqada (2) (b) ee Qodobkan** haddii aanu si kale oo ka duwan u ansixin Wasiirka, codsi ku saabsan kordhintaas waa in la soo gudbiyaa muddo aan ka yarayn 5 sanadood ka hor intaanu dhicin wejiga soo saaristu.

## Qodobka 19aad
## Xuquuqaha Qandaraaslaha

1) Qandaraaslayaasha heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka waxa ay samayn karaan heshiis wadaagis (joint Venture) kaas oo qandaraasle kasta

uu leeyahay saamiga uu boqolkiiba kaga qayb galay oo is wata oo aan kala qaybsanayn.

2) Qandaraasluhu, isagoo u hogaansamaya qodobada xeerkan, xaq wuxuu u leeyahay inuu fuliyo hawsha shidaalka, waxaanu fulin karaa hawlaha sida ugu dhakhsaha badan ee goobta heshiiska. Adeegsiga xuquuqahaas ee qandaraaslaha waxaa ay u hogaansamayaan xadidaado iyo shuruudo goobaha cayiman ee ku saabsan hawlaha cayiman oo uu qeexi doono xeerkan, xeer nidaamiye iyo heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka.

3) Iyadoo loo hogaamsamyo qodobada xeerkan qandaraaslaha waa in loo ogolaadaa inuu ka soo dhoofiyo shidaal Soomaliland kas oo uu xaq u leeyahay isagoo raacaya shuruudaha ku xusan Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka.

## Qodobk 20aad
## Nuxurka Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka

**(1)** Nuqul Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka oo laga eegan karo hab raaca loo qoro, waa in laga dhigaa waxa la heli karo ugu yaraaan sedex bilood ka hor wakhtiga uu dhacayo soo gudbintu ee ku cad Qodobka 17 aad xeerkan.

**(2)** Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka waxaa uu qeexayaa xuquuqaha iyo waajibaadyada qandraaslaha ee ku aadan Wadanka iyo qandaraaslayaasha, waana inay ka koobanyihiin waxyaabahan soo socda oo ku gaara goob walba oo heshiis lagu galay:

**a.** Goob sugayaal Juqraafiyeed ee lagu bixiyey heshiiska goobta;

**b.** Hadii ay jiraan dhawr qandraasleh, u qoondadynta danta ka qayb qaadasha u dhexeeye qandaraasalayaasha.

**c.** Mudada heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka weji kasta ee lagu sheegay, waafaqsana Qodobka 18aad (2) ee xeerkan.

**d.** Waajibaadka shaqo ee ugu yar iyo balan qaadka kharash ee ku saabsan wejiga Sahaminta.

**e.** Qodobbo khuseeya ka qaybqaadasho kasta oo Waddanku ka qaybqaadanayo.

**f.** Qodobka ku saabsan xaalada deegaanka ee khuseeya arrimaha khaaska ah ee Goobta la bixiyay.

(3) Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka waa in laga wada hadli karaa iyadoo la eegayo shuruudaha maaliyadeed ama arimaha dhaqaale qaybaha lagu sheegay xeer nidaamiyaasha ama ku dhawaaqista soo gudbinta codsiyada.

(4) Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka lagama wada xaajoon karo waxa khuseeya qodobda lagu sheegay xeerkan iyo xeer nidaamiyayaasha isaga waafaqsan.

## Qodobka 21aad
## Hawl-wadeenimo

(1) Qandaraasle oo keliya ayaa loo magacaabi karaa hawl-wadeen. Shuruudaha looga baahanyahay Hawl-wadeenka ee ka badan kuwa looga baahanyahay qandaraaslaha waxaa xeerinaya xeer-nidaamiye.

(2) Wasiirka ayaa ansxinaya magacaabista hawl wadeenka marka uu gelayo heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka islamarkaan lama bedeli karo hawl wadeenka iyadoo aanu ansixin Wasiirku.

## Qodobka 22aad
## Goob iska soo celin

(1) Heshiis wadaagista sahaminta iyo wax soo saarka waxa lagu sheegi doonaa ka noqoshadiisu inay ku salaysnaato wajiyo goobta heshiiska wax ka mid ah la celinayo, ka dib marka uu dhamaato mudada Sahaminta bilowga ah ee lagu sheegay heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax soo saarka iyo ka dib mudada dheeraadka ah ee la kordhiyay.

(2) Goob kasta oo heshiis loo haystey oo loo soo celinayo si waafqsan shuruudaha heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax soo saarka waa inay sida ugu suurtagalsan u ahaataa mid xajmigeedu isku dhegan yahay, cabirka iyo qaabkeeduna saamaxaan in si wax ku ool ah goobta la soo celiyey loogu fulin karo hawlo shidaal iyo in goob soo celintaasi waafaqsanaato xeer-nidaamiyayaal.

(3) Goobta heshiiska ee qandaraasluhu uu sii haysanayo marka uu dhamaado wakhtiga sahaminta waa inay sida ugu suurtagalsan ugu jiraan kaydadka shidaalka ee dhammaan meelaha wax laga helay ee ka mida goobta heshiiska lehna cabirka iyo qaabka Wasiirku ansixiyo, marka laga reebo haddii sidaa si ka duwan lagu sheegay heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax soo saarka.

## Qodobka 23aad
## Ka noqosho heshiis goobeed

Qandaraasle wuxuu soo celin karaa heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka, keliya marka waajibka u yar la fuliyay iyo waajibaaka kale ee maaliyadeed ee dawladu leedahay ee ay ku jiraan cashuuraha si buuxda loo bixiyay.

## Qodobka 24aad
## Xaqa in Cid kale dhigato Agabkeeda

**(1)** Qandaraalsuhu kama hor istaagi karo dhigida dhuumaha ama xadhkaha, ama agab kale gudaha ama oogada goobta heshiiska marka dhigida dhuunta, xadhiga ama agabka kale uu anxiyay wasiirku,

**(2)** Agab kasta oo mar dambe la dhigay kuma keeni karo ku haboonaansho la'aan adeegyadii ka jirey goobta ama hawlo kasto oo shidaal oo la bilaabay.

**(3)** Qodobkan farqada hore waxaa loo adeegsnayaa si la mida marinada daruuriga ah iyo qiimaynta ciidda ka hor inta aan la dhigin agabka.

## Qodobka 25aad
## Khayraadka kale ee dabiiciga ah

Haddii khayraad kale oo dabiiciga laga helo gudaha goobta ama goobaha ay koobayso ruqsadu, qandaraasluhu ama ruqsadluhu waa inuu sida ugu dhakhsaha badan ugu wargeliyaa Wasiirka sida uu qeexayo xeernidaamiyaha xeerkan.

Heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax soo saarka ama ruqsadi ma hor istaagayo xuquuq u siinta cid aan qandaraaslaha ahayn inuu sameeyo hawlo la xidhiidha khayraad dabiici ah oo aan ahayn shidaalka, haddii aanay hawlahaasi ku keenayn ku haboonaansho la'aan macquul ah hawlaha shidaalka ama agabyadii jirey. Taas waxaa la mid ah hawlaha loo adeegsanyo ujeedooyin cilmi baadhis aqooneed.

# QAYBTA 3AAD
# HORUMARINTA, SOO SAARISTA IYO XIDHIDDA

## XUBINTA 1AAD
## HORUMARINTA

## Qodobka 26aad
## Helida iyo Qiimaynta

**(1)** Haddii shidaal la helo ka dib marka la qaado tijaabooyin sida; muunad ciideed ama qodid dhulka hoostiisa lana muujiso shidaal qulqule ah, qandaraasluhu waa inuu Wasiirka ku wargeliyaa muddo 48 saacadood gudahood ah ka dib maalinta la helay.

Waana inuu sidoo kale Wasiirka siiyaa sharaxaad khaas ah oo qoraal ah oo la xidhiidha helida sida ugu dhakhsaha badan si markaa loo darso in shidaalka la helay uu istaahillo in lagu sameeyo kayd qiimayn dheeraad ah iyo in kale.

(2) Qandaraasluhu, waa inuu marka uu muujiyo in helidu u qalanto qiimayn, diyaariya una gudbiyaa Wasiirka qorshe iyo jedwal uu ku fulinayo qiimayn ku filan helidaaas iyado lagu ogolaanayo go'aan dhakhso ah in la qaato sida ugu suurto galsan ah bal in helidaasi u qalanto qorshaha horumarinta goobta iyo heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka iyadoo la cayimayo mudada la fulinayo qiimayntaas.

(3) Marka hal ama wax ka badan oo kaydka shidaalka ah la ogaado inuu ku haboonyahay in lasoo gudbiyo qorshaha horumarinta goobta. Qandaraasluhu waa inuu diyaariyaa kaydka horumarinta shidaalka si waafqsan xeerkan iyo xeer-nidamiyaasha iyo si waafaqsan dhaqanka wanaagsan ee ka jira wershadaha shidaalka.

## Qodobka 27aad
## Qorshaha Horumarinta Goobta

(1) Hawl wadeenku isagoo ka wakiila qandaraaslayaasha waa inuu u gudbiyaa Wasiirka dib u eegid ku saabsan qorshaha horumarinta goobta ee la xidhiidhada mid ama wax ka badan oo kaydka shidaalka ah in la horumariyo si waafaqsan shuruudaha xeerkan, Heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka iyo xeerarka dhaqan galka ah iyo xeer-nidaamiyayaasha. Hawl wadeenku isagoo ka wakiil ah qandaraaslayaasha waa inuu ku muujiyaa qorshaha horumarinta goobta una gudbiyaa Wasiirka in xalalkaas lasoo gudbiyey looga gol leeyahay in lagu gaadho qadar soo kabasho wanaagsan ee mudada nolosha kaydka shidaalka. .

(2) Wasiirada kale ee ka masuulka ah qaybaha muhiimka ah ee saamaynaya qorshaha horumarinta goobta waa inay helaan qorshaha horumarinta goobta si ay dib ugu eegaan, waana in loo ogolaadaa ugu yaraan 30 maalmood oo ogeysiin ah si ay faalo u soo gudbiyaan.

(3) Wasiirku wuxuu u baahan karaa wax ka bedel ama dhamaystir inuu ku sameeyo dib u eegista qorshaha horumarinta goobta.

(4) Wasiirku waxa uu dalban karaa baaxad dheeraad ah in lagu daro agabyada qorshaysan si ay mustaqbalka u suurtageliso isticmaalka dhinac sadexaad. Magdhawga baaxadaas dheeraadka ah waxay ku xadidan tahay dhinaca sadexaad inuu helo dakhliga sida uu xeerinayo xeerkan iyo xeer-nidaamiyaasha, waddankuna ma bixinayo magdhaw gaar ah.

**(5)** Ma banaana waajibaadyo dheeraad ah oo heshiis ah in la fuliyo, hawl dhismena lama bilaabi karo ilaa qorshaha horumarinta goobta la ansixiyo.

**(6)** Ansixinta qorsahaha oogada dhulka ee uu sameeyey Wasiirku ee ku saabsan horumarinta goobta dhulka ee kharashkeedu ka badanyahay 50 Million ee Doolarka Maraykanka ah, waana inay ansixiyaan Golaha Wasiiradu.

## Qodobka 28aad
## Nuxurka Qorshaha Horumarinta Goobta

**(1)** Qorshaha horumarinta goobtu waxaa uu ka kooban yahay laba qaybood oo qaybi ay ku saabsan tahay qiimaynta raadka deegaanka, qaybta labaadna ay ku saabsan tahay habka horumarinta khayraadka kaydka shidaalka iyo sidoo kale arimaha dhaqaale ee la socda hawsha iyo farsamda ku jirta xalka horumarinta.

**(2)** Hababka, shuruudaha iyo xaaladaha la xidhiidha qorshaha horumarinta dhulka oo ay ku jiraan cilmi baadhista qiimaynta raadka deegaanka ay ku yeelankarto waxaa xeerin doona xeer-nidaamiye. Horukaca qorshaha horumarinta dhulka waxaa loo fulinayaa qaab nidaamaysan lagalana xaajinayo Wasiirka, waxaana la tixgalinaya Lana rogrogayo fikrado badan oo kusaabsan arinka sida uu xeerinayo xeer-nidaamiyuhu. Waa in lagala tashadaa dadweynaha sida uu dhigayo xeer-nidaamiyuhu.

**(3)** Hawl-wadeenadu iyagoo ka wakiil ah qandaraaslayaasha waa in ay ku wargeliyaan Wasiirka isbedel kasta oo muhiim ah ama wax ka bedel ku yimaada qorshaha horumarinta dhulka ee uu ansixiyey Wasiirku iyo wax ka bedel kasta oo ku yimaada qaab hawleedka.

## XUBINTA 2AAD
## SOO SAARISTA

## Qodobka 29aad
## Tijaabada Soo Saarida

Qandaraasle waa inaanu ka qayb qaadan ama aanu fulin tijaabada soo saarista isaga oo aan ogolaasho ka helin Wasiirka, si waafaqsan qodobada uu xeerinayo xeer-nidaamiyuhu. Tijaabada Soo saarista waxaa keliya oo la fulinayaa muddo xadidan oo lagama maarmaan ah taas oo ka turjimaysa in lagu aasaaso laguna hubiyo macluumaadka looga baahan yahay in la diyaariyo hirgelinta horumar heer buuxa leh iyo soo saarista oo ay la socoto ansixinta qorshaha horumarintu

GOLAHA WAKILADA ARKIFIYADA J. SOMALILAND

## Qodobka 30aad
## Sahaminta dhuumaha shidaalka ee berriga

Qandaraaslaha ama rukhsad-laha leh ama masuul u xilsaaran dhigida dhuumaha ama xadhkaha, ee ku guda jira goobta heshiiska, rukhsada waa in xilli ku filan ka hor bilaabida sahaminta marinka dhuumaha ama xadhkaha uu u gudbiyaa xogta wasiirka iyo hay'adaha takhasuska u leh ka hawlgalka dhuumaha iyo xadhkaha shidaalka, waana in la helaa ogolaanshaha mulkiilaha/yaasha dhulka haddii aan Waddanku dhulka lahayn.

## Qodobka 31aad
## Ogolaanshaha Wax soo Saarista

**(1)** Marka codisgu ka yimaado qandaraaslaha, Wasiirku waa inuu bixiyaa ogolaanshaha mudo cayiman si loo soo saaro xadiga shidaalka ee laheli karo. Wasiirku waa inuu cayimaa habka iyo xaqiijinta kaydka qoraalada (Document) looga baahan yahay codsiga iyo bixinta ogolaanshaha soo saarista uu ogolaaday xeer-nidaamiye.

**(2)** Qandaraasluhu waa inuu fuliyaa qiimeyn joogto ah oo uu ku samaynayo istraatijiyada wax so saarka iyo technoolajiyada, waana inu qaadaa talaaboyinka kor loogu qaadayo ee ku saabsan wax ku oolnimada soo saarista.

**(3)** Wasiirku wuxuu amri karaa qandaraaslaha inuu qaado talaabooyinka lagama maarmaanka ah iyo talaabooyinka macquulka ah ee kor loogu qaadayo ama lagu yaraynayo heerka shidaalka lagu soo saarayo iyo heerka kor loogu qaadyo soo saarista ugu danbaysa ee shidaalka laga soo saaryo **Goobta**, iyadoon la dhaafinayn baaxada jirtey ee adeegyada soo saarista si waafaqsan xeer nidaamiyaasha.

**(4)** Wasiirku wuxuu ka dalban karaa qandaraaslaha, inuu u soo gudbiyo warbixin ku saabsan adeegyada la xidhiidha soo saarista shidaalka, oo ay ku jiraan qorshayaal la kala dooran karo oo ku saabsan soo saarista iyo kor u qaadida ama farsamooyin casriya korna u qaadaya kasoo kabashada hawsha.

## Qodobka 32aad
## Cabiraada Shidaalka

Wasiirka ayaa ku soo saaraya xeer-nidaamiye, qalabka, hababka, heerarka iyo heerka cabiraada ee la adeegsanyo cabirka soo saarista shidaalka, sifaynta/habaynta ama dhoofinta ku saabsan maamulka khayraadka, hawlgalka farsameed, dhaqaalaha iyo ujeedooyinka lacageed oo ay ku jiraan dhamaan waxyaabaha uu liis gareeyey hantidhowrku.

## Qodobka 33aad

## Midaynta

**(1)** Hadii kaydka shidaalku ku fido meel ka baxsan khadka xadaysan ee heshiika goobta una fido goob kale, dhamaan qandaraaslayaashu waa inay raadiyaan inay gaadhan heshiis sida ugu wanaagsan ee la isugu duwi karo hawlaha shidaalka si loo xaqiijiyo ka soo kabashada shidaalka ee ugu saraysa oo ay ku jiraan qayb kasta oo ka mida xuquuqda qandaraaslaha ee shidaalka, isla markaana waa in israacsanaanta heshiisyada loo gudbiyaa Wasiirka si uu u ansixiyo.

**(2)** Haddii ay si wada jira qandaraaslayaashu u galeen heshiis isku mida ah si waafaqsan faqrada (1aad) lakiin, ay ku guuldaraysteen is afgarad dhexdooda muddo macquul ah, Wasiirku wuxuu soo rogi karaa shuruudo iyo xaalado heshiiska qaybinta oo ay ku jiraan kala qaybinta lagama maarmaanka ah iyo mabaadiida dib u qaybinta xuquuqaha qandaraaslayaasha ee ku wajahan shidaalka.

**(3)** Hadii heshiiska kaydka shidaalku uu dhaafo goobta heshiiska uuna galo goob aan ku jirin Heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka, qandaraasluhu wuxuu codsi u soo **gudbinaya** Wasiirka si uu u fidiyo heshiiska goobta si waafaqsan qodobada uu xeerinayo xeer-nidaamiyuhu. Wasiirku wuxuu qeexi karaa shuruudo daba socda codsiga, kuna dari karaa goobo dheeraad ah, sida waaafaqsan faqradan.

Haddii kaydka shidaalku uu dhaafo xuduuda caalamiga ah ee Dawladda, keydka shidaalka waxa lagu dabaqayaa qodobada caalamiga ah ee israacsanaanta ee ku dhigan mucaahado ay galeen Dawladda iyo wadamada ama wadanka jaarka ah. Marka laga reebo sababo bedqab awgood. Hawl shidaal lagama samayn karo, keyd shidaal oo xuduudaha labada dal iskaga gudba ka hor inta aan la gelin mucaahado ka dhaxaysa wadamaday ay khusayso.

**(4)** Hadii heshiis si waafaqsan (4aad) uu hirgalo, ogolaanayo qiimayn iyo kormeer ay samaynayaan shaqaalaha dawladkale, qaranku wuxuu siin karaa xasaanad shaqaalaha dawlada ee ajinebi ee arimaha la xidhiidha shaqadooda si ay u fuliyaan si waafaqsan qodobada heshiiska.

## Qodobka 34aad
## Hawlo shidaal oo si wada jira loo fulinayo

**(1)** Qandaraaslayaasha ka kooban laba ama waxa ka badan oo leh goobo isku xiga oo laga helay kayd shidaal, waxay ku heshiin karaan in hawlaha shidaalka si wada jira u fuliyaan.

GOLAHA WAKILADA ARKIFIYADA SOMALILAND

**(2)** Hawlo shidaal oo wada socda si waafaqsan faqrada (1) waa inay qandaraaslayaashu sameeyaan hawl wadaaga si faa'ido weyn loo wada gaadho gaar ahaan kor u qaadida helida shidaalka ama yaraynta kharashka ku baxaya.

**(3)** Heshiisyo ku saabsan qodaal sahamineed oo si wada jir ah ku gaadheen qandaraaslayaashu, waa inay u gudbiyaan Wasiirka. Heshiisyada kale ee ku saabsan hawlaha shidaalka wadaaga waxaa loo gudbinayaa Wasiirka si uu u ansixiyo.

**(4)** Hadii aanay qandaraaslayaashu ku guuldaraysantaan inay ku heshiiyaan shuruudaha ku saabsan hawl shidaal oo la wada qabanayo si waafaqsan faqrada (2) muddo macquul ah gudaheed, shuruudaha iyo xaaladaha waxaa qeexi doona Wasiirka.

## Qodobka 35aad
## Isticimaalka gaaska dabiiciga ah iyo xadidaada sii deynteeda iyo holcinta

**(1)** Gaaska dabiicaiga ah ee ku lamaan saliidda waxaa keliya oo loo isiticimaali karaa hawlaha shidaalka si waafaqsan hab-raaca iyo xeer-nidaamiyayaasha ugu wanaagsan ee la heli karo ee la qoondeeyo.

**(2)** Qandaraaslayaasha ama ruqsadlayaashu waa in ay ka helaan ogolaansho wasiirka, ka hor in taan la samayn holcin ama ku siidayn gaasta hawada lagu sii daayo iyada oo qabow. Holcinta ama hawada ku siidaynta gaasta iyada oo qabow iyo waxyaalaha la socda waxaa keliya la ogolaan karaa, marka ay lagama maarmaan u tahay badbaadada oo ay ku jirto xaaladaha deg-dega ah, oo aan wakhtigu ogolaanayn in ogolaansho la helo ama marka agab hawleed la dhisayo.

## Qodobka 36aad
## Ruqsadaha Agabka

**(1)** Wasiirku wuxuu shuruudo cayiman ku siin karaa codsi cayiman rukhsad ku saabsan dhisme, meelayn iyo hawlgal gaadiid/safar ama hawlo kaydin marka aanay xuquuqahaasi mar hore aanay ku jirin qorshaha horumarinta goobta.

**(2)** Rukhsada agabka waxaa la bixin karaa xiliga uu cayimo Wasiirku. Codsiga waa inuu ku jiraa raadka qiimaynta deegaanka iyo iyadoo loo hogaasamayo shuruudaha kale, hababka codsiga, shuruuda bixinta iyo waxyaabaha ku jira shuruudaha waxaa qeexi doona xeer-nidaamiye.

**Qodobka 37aad**
**Xaqa helidda dhinaca sadexaad**

Wasiirka ayaa go'aan ka gaadhi doona isagoo ku salaynaya shuruudaha ku dhigan xeer-nidaamiyayaasha in dhinaca sadexaad uu leyahay xaqa isticimaalka awood dheeraad ah, oo ku saabsan adeega soo saarista, safrida ama kaydka shidaalka.Habraacyada iyo mabaadiida canshuurta waxaa qeexi doona xeer-nidaamiyayaal

**Qodobka 38aad**
**Adeegsiga saldhiga, degida iyo goobaha laga dhoofinayo shidaalka**

**(1)** Wasiirku wuxuu qeexi karaa marka shidaalka laga helay lakabka hoose, in la dhigo meel maraakiibta shidaalku ay ka dhoofin karaan, haka yimaado beriga ama lakabka hoose midkood.

**(2)** Hawlaha shidaalka oo ku saabsan lakabka hoose ee dhulka waa in laga fuliyaa saldhiga Soomaaliland sida hadba uu u tilmaamo Wasiirku.

**Qodobka 39aad**
**Tamar bixinta xaalad deg-deg ah**

Haday jirto xaalad dagaal ama xaalad kale oo deg-deg ah oo saamaynaysa bixinta tamarta. Wasiirku wuxuu ka dalban karaa qandaraaslaha inuu ka iibiyo dhamaan ama qayb ahaan tirada shidaalka ee la soo saaray **Wadanka ama** hay'ad dawladeed iyadoo laga siinayo qiimaha suuqa ee wakhtigaa.

**XUBINTA 3AAD**
**XIDHIDA GOOBTA HAWLGALKA**
**Qodobka 40aad**
**Joojinta Hawlgalada**

**(1)** Si waafaqsan xeer-nidaamiyayaasha, qandaraaslaha ama ruqsadluhu waa inuu wakhti hore sii wargeliyaan Wasiirka sida ugu dhakhsaha badan ka hor dhamaadka hawlaha shidaalka ama isiticimaalka adeega.

**(2)** Ka dib Dhamaadka hawalaha shidaalka ee goob kasta oo waafaqsan xeerka, qandaraaslaha ama ruqsadluhu waa inay dib u hagaajiyaan goobaha shidaalka ee la sameeyey kana saaraan dhamaan wixii khasaare ku sababi kara ama khatar ku keeni kara deegaanka iyaga oo raacaya sida ay dhigayaan xeerarka u yaala. dib usoo noolayntaas goobta waa ina laga hawlgalaa gaar ahaan ka saarista dhamaan hantida la keenay goobta ee la isticmaalay laakiin aan sidaas loogu sii baahnayn. Dib-usoo noolaynta goobta, hawlaha dheeraadka ah ee shidaalka la xidhidha, qufulida dhamaan

ceelasha laga haajiray/tegay, xafidaada iyo ilaalinta khayraadka dabiica ah ee goobahaas sida uu xeerinayo xeer-nidaamiyuhu.

## Qodobka 41aad
## Qorshaha xidhitaanka goobta

**(1)** Qorsaha xidhitaanka/soo afjarida waa in si waafaqsan xeer-nidaamiyaha loogu soo gubiyey Wasiirka ugu horeyn sedexda sanadood intaan go'anka xidhitaanku dhicin kana dambayn hal sano dhicitaanka rukhsadooda ama ka noqoshada la qorsheeyay ee heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ama furasada agab si waafaqsan xeerkan ama dhamaadka isticimaalka adeegyada ee aaladaha qalabka. Hadii arin degdeg ahi timaado sida kacdoon, xaalada ka noqoshada ee heshiiska, heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ama ruqsada agab qorshaha xidhitaanka goobta waa in la diyaariyaa loona gudbiyaa sida ugu dhakhsaha badan.

**(2)** Dhamaystirka/ soo afjarida goobta hawshu ka socotay, Wasiirku ayaa leh go'aanka ku saabsan hirgelinta qorshaha dhamaystirka. Go'aanku Wasiirku wuxuu wax ka bedeli karaa qorshaha la gudbiyey, ama wuxuu dalban karaa wax ka bedel qorshaha loo gudbiyey.

**(3)** Qandaraaslaha ama ruqsadlaha iyo dadka kale ee masuulka ah waa inay hirgeliyaan go'aanka dhamaystirka sida waafaqsan faqrada (2) si habsan la'aan ah. Qof kasta oo ka masuul ah hirgelinta **go'aanka xidhitaanka** waxaa uu masuul ka noqonayaa khasaaraha uu gaadhsiiyey dhinac sadexaad si waafaqsan qodobada xeerkan.

## Qodobka 42aad
## Lacagta dhamaystirka goobta

Si loogu helo lacag hawlagalada dhamaystirka goobta hawshu kasoctay ee ku jirto ansixinta qorshaha ka saarista ee qandaraaslaha ama rukhsadalaha, waa inay aas aasaan lacag ka saarista/dhamaystirka loogu talagalay goobta shidaalka si wafaqsan xeer-nidaamiyaha uu soo saaray Wasiirku.

## Qodobka 43aad
## Dib u qaadasho

**(1)** Dawladu iyada oo aan wax magdhaw ah ka bixin ayay la wareegaysaa lahaanshaha ama xaqa isticmaalka agabka marka heshiiska sahaminta iyo wadaagista ama ruqsada agabku si waafaqsan xeerkan ay u dhacdo ama dib loo soo celiyo (lala noqdo) ama agabka isticmaalku uu dhamaado. Marka dawladu la wareegayso agabka waa inuu ku jiraa xaalad wanaagsan oo shaqaynaysa.

(2) Hadii agabka la dhigo dhul si gaar ah loo leeyahay, dawladu waa inay uga magdhawdaa mulkiilaha dhulka isiticmaalka dhulka ee ka baxsan mudada intii hore ruqsadluhu ama qandaraasluhu u bixiyey. Si waafaqsan Dastuurka iyo qodobka 60aad ee xeerkan iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah.

(3) Marka ay la wareegto dawladu agabka. Lacagta loogu talagalay in lagu daboolo kharashka joogtada ee dhamaadka hawla shidaalka ama ka saarida waa inay noqotaa hanti dawladu leedahay marka lacagtaasi ay u ururto isla markaana uu ku rido sanduuq gaarka ah, qandaraasluhu ama rukhsadluhu isagoo ka keenaya dakhliga si waafaqsan kharashka dib usoo kabashada heshiiska sahaminta iyo wadaagida waxa soo saarka, rukhsada ama cashuuraha lagu dhaqan geliyey sida xeerarka khuseeyaa dhigayaan.

(4) Hadii isticmaalka dhulku uu kiraysnaa, dawladu waxay xaq u leedahay inay kusii wado kiradaas isla shuruudihii dhaqan galka ahaa ka hor dhicitaanka, dib usoo celinta rukhsada ama lasoo noqoshada heshiiska wax soo saarka iyo qaybsiga faaiidada dhamaadka isticmaalka agabka.

(5) Hadii dawladu doonto inay la wareegto agabka lala damacsanyahay in laxawilo/dhoofiyo, qandaraaslaha ama rukhsad haystuhu waa inuu ku wareejiyaa dhamaan xuquuqaha iyo diwaanada la xidhiidha agabkaa iyo hawl galada lagama maarmaanka u ah sii wadidda hawalaha shidaalka si waafaqsan shuruudaha lagu sheegay xeer nidamaayaha dawlada

(6) Xuquuqaha isticmaalka ee dhinaca sedexaad ee la xidhiidha agabka uu ansixiyo wasiirku waxay sii ahaanayaan dhaqan gal hadii dawlada la wareegto agabka.

# QAYBTA 4AAD
# XUQUUQAHA, CASHUURAHA, CAAFIMAADKA, BAD-QABKA IYO DEEGAANKA

## XUBINA 1AAD
## AJUURADA IYO ABAALMARINTA GOOBTA

### Qodobka 44aad
### Kirada goobta sahanka

1. Qandaraasluhu waa Waddanka siiyaa ajuuro kiro goobeed oo goobta ay heshiiska u haystaan ah, taas oo bilaabanaysa taariikhda uu heshiiska sahaminta iyo wax soo saar wadaaggu dhaqan galo, intaa wixii ka dambeeyana si sannadle ah.

2. Kirada goobta sahanku waa inay noqotaa mid kobocda oo loo xisaabiyo kiloomitir laba-jibaaran oo ku salaysan hababka iyo dariiqooyinka lagu sheegay xeer-nidaamiyayaasha ama heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax soo saarka, waanay kala duwanaan karaan goobaha badda iyo beriga. Goobaha heshiiska isagoo u hogaansamaya hawlaha socda ee shidaalka iyo haddii caqabado ka horyimaadan ka baxsan xakamaynta qandaraasluhu xeerka guud wuxuu noqonayaa in aan waajib loogu yeelan kirada goobta sahanka ee ay xeer-nidaamiyayaal qeexitaan dheeraad ah ka bixiyeen.

## Qodobka 45aad
## Ajuurooyinka iyo Abaalmarinada

**(1)** Dawladu waxay ku soo saari kartaa xeernidaamiyeyaal ama heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka in ajuurooyinka la bixinayo ee la xidhiidha soo saaris kasta oo shidaal oo xuduuda Dawladda gudihiisa iyo badda hoosteeda.

**(2)** Dawladu waxay xaq u leedahay inay ka ururiso xuquuqaha ajuurada, ha ahaato naqad/kaash ama alaab ahaan, saami ahaan sida soo saarista ka timi kaydka shidaalka oo u hogaan-samaysa qorshaha horumarinta ee la ansixiyey iyo ogolaanshaha wax soo saarka, marka laga reebo shidaalka dib loo geliyey kaydka shidaalka ee ku guda jira goobta heshiiska.

**(3)** Shidaalka laga soo saaray ee waafaqsan heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka waxaa uu u hogaansamayaa lacag bixinta ajuurada ee cadadka iyo heerka hababka lacag bixinta hadba sida uu u cayimo xeer-nidaamiyuhu, qandaraasluhuna waxaa uu masuul ka yahay lacag bixinta ajuurada sida waajibtay ee la xidhiidha shidaalkaas.

**(4)** Ajuurooyinka loo qoondeyey Dawladda waa inaaney dabasocon lacag bixin, alaab ahaana waa in loogu keenaa Dawladda kharash la'aan, marka loo keenayo si waafaqsan qorshaha horumarinta.

**(5)** Dawladu waxay ku qeexi kartaa xeer-nidaamiye ama heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ee lagu talagay ajuurada lacag bixinta ku cayiman ujeedada/yoolka.

## Qodobka 46aad
## Saamiga qaybsiga

Habka xisaabinta iyo qoondeeynta wadaagista soo saarista oo ay ka mid tahay qarashka shidaalka iyo faaiidada shidaalka waa inuu wasiirku ku sheegaa heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka si waafaqasan xeernidaamiyayaasha ay u ansixiyeen golaha wasiiradu.

GOLAHA WAKILADA ARKIFIYADA J. SOMALILAND

## Qodobka 47aad
## Qiimaha Shidaalka

**(1)** Qiimaha shidaalka waxaa uu waafaqsanaan doonaa hababka lagu qeexay xeer-nidaamiyayasha waxaana uu ku salaysnaan doonaa qiimaha shidaalka ee laga soo xigtay dhexdaxaadiyaal sadexaad oo ku xeel dheer qiimaha suuqa caalamiga ah ee la mid ah tayada shidaalka.

**(2)** Iib kasta ama cadadka shidaalka la gaadhsiiyey waa in lala socod siiyaa Wasiirka.

## Qodobka 48aad
## Qiimaha Suuqa

Iyada oo loo hogaansamayo qodobada xeerkan, waxaa tixgelin mudan hawl kasta oo u dhaxaysa qandaraasle ama ruqsadlaha iyo cid xidhiidh la leh si la xidhiidha hawlaha shidaalka ee loo fulinayo sida ku cad xeerkan iyadoo lagu salaynayo qiimaha tartanka caalmiga ah ee jira iyo shuruudaha kale ee cadaaladda noqonaya isla markaasna macquul ah hadii hawshaasi ay ka dhex dhacday qandaraasle ama ruqsadle iyo cid aan xidhiidh la lahayn ahayn.

# XUBINTA 2AAD

# CASHUURAHA

## Qodobka 49aad
## Cashuurta iyo Dhaafida

Qandaraaslaha iyo rukhsadalayaasha fulinaya hawlaha shidaalka ee xuduuda qaranka gudihiisa iyo badda hoosteeda waxa u hogaansamayaan canshuuraha iyo ka dhaafida canshuurta sida ku qeexan xeerka dhaqan-galka ah, Wasiirku wuxuu xeerinaya heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka isla markaana ilaalin doonaa isbedel wayn oo lagu sameeyo cashuuraha iyo ka dhaafista, si aanay u saamayn heshiiska.

## Qodobka 50aad
## Lacag Bixinta

Lacag bixinta dhamaan ajuurada, abaalmarinta iyo lacag bixinada la siinayo Dawladda ee la xidhiidha hawlaha shidaalka ee waafaqsan xeerkan iyo heshiiska soo saarista waxay waafaqsanaan doontaa Xeerka Dakhliga Shidaalka.

## Qodobka 51aad
## Rahanka iyo Diiwaangelinta Xuquuqaha

**(1)** Qandaraasle wuxuu rahmi karaa danta ka qayb-qaadashadiisa oo keliya ee heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ama rukhsada agabka ee ku saabsan in lagu maal-geliyo hawlaha shidaalka ee la xidhiidha heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ama rukhsada agabka kadib, marka uu Wasiirku ansixiyo si waafqsan xeer-nidaaamiyaha uu cayimo Wasiirku. Adeegyada muhiimka ah iyo qalabka uu leeyahay adeega muhiimka ah waa inaan loo rahmin si gaar ah.

**(2)** Rahmida lagaga qayb qaadanayo danaynta heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ama agabka ruqsada ee ka kooban xuquuqaha waxaa loo raaci kara heshiiska gaar ah ama ruqsada.

## Qodobka 52aad
## Diiwangelinta rukhsadaha iyo heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka

**(1)** Diiwaanka rukhsadaha iyo heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka waa in lagu hagaa si waafaqsan xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

**(2)** Daynta wax loo rahmay loona diiwangeliyay si waafaqsan farqrada (1aad) waxay ka mudantahay daymaha kale laga bilaabo taaariikhda rahanka laga diwaangaliyay diwaanka shidaalka, marka laga reebo daymaha la doorbiday ee lagu sugay xeerka khuseeya.

**(3)** Diiwaanka rukhsada iyo heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka waa in lagu xidhaa diiwaan dhulka hanaan/wadanka ka jira oo waafaqsan xeerkan.

# XUBINTA 3AAD
# CAAFIMAADKA, BAD QABKA IYO DEEGAANKA

## Qodobka 53aad
## Awooda caafimaadka, bad qabka iyo deegaanka

**(1)** Ka hor inaanu qandaraasluhu ama ruqsadluhu fulinin hawl kasta oo shidaal waa inuu dhowraa qorshaha amni sida uu xeerinayo xeernidaamiyuhu isla

markaasna xafidaa goobta shaqo sida uu awooda u leeyahay inuu si wax-tarleh u la dhaqmo dabka, daadashada saliida, wasakhawga-, shilalka ama xaaaladaha deg-dega ah si looga hortago ama loo maamulo xaaladaas lagu yaraynayo lumista iyo khasaaraha ku yimaada.

**(2)** Qof kasta oo maaraynaya ama wada hawl shidaal si waafaqsan ama ka dhalanaysa heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ama rukhasad loo bixiyay si waafaqsan xeerkan, waa in la ilaaliya heerka caafimaad iyo badqabka sare ee shaqaalihiisa iyo qandaraaslayda hoosyimaada.

**(3)** Ruqsadle iyo ka qaybqaate kale oo hawlo shidaal waa inay noqdaan kuwo leh takhasus ay shaqada ugu qabtaan si taxadar leh.

**(4)** Hawlaha shidaalka waxaa loo samayn doonaa qaab suurtagelinaya in la joogteeyo heer badbaado oo sareeya, isla markaana loo sii horumariyo si waafaqsan horumarka tignoolojiyada, hanaanka ugu wanaagsan ee urur-weynaha shidaalka, Xeerarka caafimaadka iyo xeerarka kale ee khuseeya.

## Qodobka 54aad
## Aagaga Badqabka

**(1)** Hadii aanu si kale u go'aamin Wasiirku.Waa inay jiraan goob amaan ah agagaarka iyo dusha agabka, Hadii ay dhacdo shilal ama xaalado deg-deg ah, Wasiirku wuxuu aasasi karaa ama fidin karaa aaga badqaba (badbaado). Baaxada aagaga badqabka waxa go'aaminaya golaha wasiirada. Qodobkani looma adeegsanayo dhuumaha iyo xadhkaha.

**(2)** Golaha Wasiiradu waxay islaqaadan (go'aamin) karaan in goobaha bedqabka ee badda ay fidsanaan karaan oo looga gudbi karo wadan jaar ah. Si kastaba ha ahaatee, Wasiirku wuxuu go'aamin karaa in uu jiro aag bed qaba oo badda ku dhow oo dawladu leedahay, xitaa hadii agabka su'aashu ka taagan tahay ay taalo meel ka baxsan xuduuda badda agteeda ee Somliland.

**(3)** Wasiirku wuxuu go'aamin karaa in goob bed qab ah la aasaaso wakhti macquul ka hor intaan la dhigin allabta ku xusan farqada 1aad.

**(4)** Wasiirku wuxuu go'aamin karaa hadii ay jirto meel hore loo isticmaali jiray bedqab (goob amaan) agab laga tegay ama la aasay la isticmaali karo.

**(5)** Doonyaha, maraakiibta iyo agabka kale ee aan haysan ogolaanshiiyaha waa inaan la dhigin goobaha lagu soo sheegay farqadaha (1aad), (2 aad),(3 aad), iyo (4 aad). Wasiirku wuxuu ogolaan karaa kaluumaysiga in uu ka dhaco aaga ama qaybaha ku dhow goobta hawsha laga wado, iyadoon waxba yeelayn bedqabka ama faragelinayn hawlaha shidaalka.

GOLAHA WAKIILADA ARKIFIYADA SOMALILAND

**(6)** Wasiirku wuxuu ku cayimi karaa xeer-nidaamiye si uu u sugo amaanka goobta iyo alaabada ku xusan qaybta (1aad) ee goobaha sida ku cad farqada (3aad).

**(7)** Qodobkan looma adeegsanayo agabyada berriga ama xeebaha iyada oo la ilaalinayo xuquuqaha gaarka ah ee hantida khaaska ah.

## Qodobka 55aad
## Udiyaargarawga xaaladaha degdega ah

**(1)** Ka hor intaan la bilaabin hawlaha shidaalka ruqsadlaha ama qandaraasluhu waa inay sameeyaan qorshayaal loogu diyaar-garoobayo xaaladaha degdega ah si waafaqsan xeer nidaamiyayaasha uu waasiirku soo saaro.

**(2)** Rukhsadlaha ama qandaraasluhu waa inuu bilaabaa wadaana talaabooyin amni oo wax ka taraaya in laga fogaado weeraro ka dhan ah agabka waana inuu lahadaa mar walba qorshayaal ku saabsan xaaladaha degdega ah oo wax lagaga qabanayo weeraradaas.

**(3)** (Ruqsadluhu ama qandaraasluhu waa inuu agabka u ogolaada masuuliyiinta khusayso tijaabooyinka tababarada xaaladaha degdega ah iyo amniga, waana in marka ay daruuri tahay ka qayb qaataan tijaabooyinkaas tababar.

**(4)** Ciidan hubaysan waxa Waddanku keeni karaa oo keliya markuu codsado hawl-fuliyaha ama ruqsadlaha iyo qandaraaslaha.

**(5)** Ruqsadle ama ka qaybqaate kale oo hawlo shidaal waa inuu xili kasta ku sugnadaa diyaar ahaansho munaasab ah oo xaalad degdeg ah, kaas oo ujeedkiisu yahay la tacaalidda shilalka iyo xaaladda degdega ah ee keeni kara dhimasho ama dhaawac shakhsi, wasakhayn ama waxyeelo weyn oo hantiyeed.

**(6)** Ruqsadluhu waa inuu hubiyaa in la sameeyo talaabooyinka loo baahan yahay in lagaga hortago ama lagu yareeyo saamaynaha waxyeelada leh, talaabooyinkaa oo ay ka mid yihiin kuwo loogu baahan yahay in sidii suurtagal ah loogu soo celiyo deegaanka xaaladdii uu ku sugnaa ka hor intii aanu shilku dhicin.

## Qodobka 56aad
### Hakin waddanku sameeyo

Mar kasta oo ay dhacdo in ruqsadle uu ku guuldaraysto inuu u fuliyo hawlo shidaal si amaan ah oo waafaqsan sharciga khuseeya iyo farsamooyinka caalamiga ah ee jira iyo hababka bah-weynta shidaalka ee xaaladdo la garab dhigi karo, Wasiirku, ka dib marka uu rukhsadlaha ama qandaraaslaha kii ay noqotoba siiyo ogaysiis macquul ku ah

wacyiga, Wasiirku wuxuu qaadi karaa dhammaan talaabooyinka daruuriga ah si uu u hubiyo badbaadada. Talaabooyinkaas oo ay ku jiraan hakinta hawlaha shidaalka ilaa inta loo baahan yahay ee ay ogalaanayaan hawlaha shidaalka, waxaana kharashka ku baxa laga qaadayaa rukhsadlaha ama qandaraaslaha.

## QAYBTA 5AAD
## QODOBADA KALA DUWAN

### Qodobka 57aad
### Shaqada

Heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ama rukhsada agab ee loo bixiyay si sharcigan waafaqsan, si dadban iyo si toosa toona uma bixin karto gacan ku hayn buuxda qof dan ka qayb gal ku leh heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ama ruqsada agabka, uu ku wareejiyo, gebi ahaan ama qayb ahaan qandaraaslaha ama ruqsadluhu qof kale iyada oo aan ogolaansho qoraal ah laga helin wasiirka.

### Qodobka 58aad
### Xuquuqaha Dhulka

**(1)** Iyadoo loo hogaansamayo qodobada xeerkan iyo xeer-nidaamiye sida uu xeerinayo, dawladu, qandaraaslaha ama ruqsadluhu xaq buu u leeyahay inuu galo dhul kasta oo aan ahayn xarumo ciidan si u fuliyo hawlo shidaal.

**(2)** Qof kasta oo haysta lahaansho ama dan ku leh, dhul kaas oo Dawladda, qandaraaslaha ama ruqsadluhu u soo jeediyo inuu galo kana fuliyo hawlo shidaal waa inuu ogolaadaa hawlahaas iyada oo shardi tahay:

- **a)** intaan la bilaabin hawlahaas, dhamaan dadka leh shaqada ama danta ka leh dhulka hawshaas laga fulinayo, waa in la ogeysiiyaa ujeedada, nooca iyo goobta hawsha laga fulinayo;
- **b)** qof kasta oo leh lahaanshaha ama dan ka leh **Dhulkasta oo rukhsad u haysto** ay soo gaadho khasaare ama waxyeelo oo najiitadeedu tahay hawl shidaal, wuxuu xaq u leeyahay magdhawga sida ay xeerarka khuseeya dhigayaan
- **c)** Magdhawga waa in loo xisaabiyaa qiimaha ka hor intaan la bilaalbin hawlaha shidaalka ee dhulka arintu ku saabsan tahay.

### Qodobka 59aad
### Hawlaha wax ku oolka ah ee Shidaalka

Hawlaha shidaalka waa in loo fuliyaa si xilkasnimo ah oo waxtar leh oo waafaqsan xeerka dhaqangalka ah iyo caadooyinka wanaagsan ee caalamiga ah

ee ka jira shaqada shidaalka, iyadoo lala imanayo farsamo yaqaan-nimo wanaagsan iyo dhaqamo teknoloojiyadeed Lana isticmaalayo teknoolajiyad hore-u- marsan oo ku haboon iyo qalab wax ku ool ah, mishiino, habab iyo alaabooyin tayo leh.

## Qodobka 60aad
## Xogta, macluumaadka iyo Warbixiin muunada iyo Maaraynta

**(1)** Rukhasadlayaasha iyo qandaraaslayaasha iyo hay'daha kale ama dadka fulinaya hawsha shidaalka waa inay ilaaliyaan xafidaana dhamaan tixraacyada saxda ah ee Soomailand gudaheeda, ee ah dhamaan hawlaha shidaalka la fuliyey, sida dhamaan raad-raaca macluumadka khuseeya shidaalka, alaabada (qalabka), macluumaadka iyo habka muunada la helay isla markaasna xafidaan buugag maaliyadeedka oo dhan oo sax ah raadraaceeda, diiwan galin la xidhiidha Hawl-galka. Hadii rukhsada ama heshiiska wax soo saarku dib loosoo celiyo hawlwadeenku waxuu masuul ka yahay inuu ilaaliyo isla markaan hayo macluumaadka la xidhiidha rukhsada uu soo celiyay ama heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka.

**(2)** Qandaraaslaha iyo rukhsadluhu waa inay siiyaan Wasiirka warbixino joogto ah oo mudaysan oo ku saabsan hawlaha ay fulinayaan waana inay siiyaan tixraaca noocyada iyo macluumaadka warbixinada sida hadba Wasiirku ugu baahdo ama uu u xeerinayo xeernidaamiyuhu.

**(3)** Alaabooyinka loo baahaan yahay, oo ay ku jiraan xogta Eleg-trooniga ah) (soft wars), si loogu isticmaalo ama loo helo alaabta la gudbiyay ama laga warbixiya waa inuu wasiirku sidoo kele heli karaa.

**(4)** Wasiirku waa inuu xaqiijiyaa in alaabada loo gudbiyey Dawladda ay tahay mid sir ah mudada uu dhigayo xeer nidaamiyuhu.

## Qodobka 61aad
## Damaanado

Rukhsadlayasha iyo qandaraaslaha waa inay siiyaan Wasiirka, xidhiidhka gudashada iyo damaanad qaadka sida loogu baahdo si waafaqsan xeer-hoosaadka iyo shuruudaha rukhsada ama sahaminta iyo wadaagida waxa soo saarka waafaqsan xeernidaamiye si loo hubiyo fulinta waajibaadyada ee rukhsadlaha iyo qandaraaslaha ama si uu guto masuuliyadaha ka dhalanaya hawsha ku cad waa inay jiraan goob amaan ah iyo si lo hubiyo waafaqsanaanta xeerka dhaqan-galka ah.

## Qodobka 62aad
## Masuuliyahadaha

**(1)** Rukhsadlaha iyo qandaraaslaha haysta rukhsad ama heshiiska sahaminta iyo wadaagida waxa soo saarka waxaa wadar ahaan ama keli-keli ahaan ay masuul ugu yihiin dawlada, waajibaadyada ku saabsan ama ka dhasha ee la xidhiidha hawlaha shidaalka ee ku guda jira rukhsada ama heshiis goobeed.

**(2)** Rukhsadle kasta oo leh rukhsad ama qandaraasle heshiiska sahaminta iyo wadaagida waxa soo saarka, waxaa uu wadar ahaan iyo keli-keli ahaanba masuul ugu yahay dhinac sadexaad iyo si ku salaysan qiime hore loo sii gooyey oo uu ku leeyahay rukhsad layaasha kale isla rukhsadaas ama heshiiska sahaminta iyo wadaagida waxa soo saarka.

**(3)** Masuuliyahada la xidhiidha dhinaca sadexaad ee uu galay qof fulinaya hawl rukhsadle ama qandaraasle kadib rukhsadlayaasha ama qandaraaslayaashu, waxaay wadar ahaan iyo keli keli ahaanba masuul uga noqonaayaan khasaaraha ama lumista uu sababay, dhib geystaha ama uu keenay qof kasta oo ku shaqaynaayay tilmaamo kasta iyo kormeerka rukhsadlaha ama qanadaraaslaha.

**(4)** Rukhsadlaha ama qandaraasluhu waxaay masuul ka yihiin wasakh kasta ama waxyeelo lagu keenay ama ka imanaya hawlaha shidaalka iyo sidoo kale wasakhda ama khasaaraha ka imanaya hawlaha shidaalka ay qabteen qandaraasleyashu, qandaraaslaha hoose/labaad ama wakiil ama shaqaale rukhsadlahaas iyo qandaraaslaha. Waana inay qaadan dhamaan talaaboooyinka lagu daweynayo wasakhda ama khasaare la sababay hababka la xidhhiidha dacwadaha iyo dawbaxa lagu sheegay xeernidaamiyayaasha.

## Qodobka 63aad
## Caymiska

**(1)** Ruqsadlaha iyo qandaraaslaha kugudo jira hawlaha shidaalka waa inay caymis kaga jiraan shirkad layaqaano si waafaqsan xeerkan.

**(2)** Caymisku waa inuu ugu yaraan daboolaa:

**(a)** Khasaaraha adeega/dhismaha.

**(b)** Khasaaraha wasakhda iyo masuuliyadaha kale ee ku wajahan dhinaca sadexaad.

(c) Ka saarida waxyaabaha la taaban karo iyo nadiifinta hadhaaga hawlaha shidaalka ama shilalka ee hadhaaga.

(d) Rukhsadlaha iyo shaqaalaha qandaraaslaha ku hawlan hawlaha shidaalka.

(3) Rukhsadlaha iyo qandaraasluhu waa inay hubiyaan in qandaraaslayaasha hoose uu u qaatay rukhsadluhu hawsha shidaalka, waa inay si isku mid ah u caymiyaan shaqaalahooda, sida xadka rukhsadlaha u caymiyaan shaqaalahooda.

(4) Wasiirku waxuu codsan karaa xog-kaydiyayaasha (dhukunmentiyada) ee heshiiska caymiska soona bandhigida karaa hadii loo baahdo caymis ka balaadhan ka jira ama bedelida karaa shuruudaha.

## Qodobka 64aad
## Qandraaslayaasha iyo Qandaraaslayaasha labaad

Rukhsadlaha ama qandaraasle waa inuu hubiyaa qof walba inuu gudanayo shaqada shirkada, ha ahaado shaqsi ama shaqaale la westeeyay ama mid soo maray qandaraasle ama qandaraasle hoose/labaad, waa inay u hogaansamaan qodobada uu dhigay hawlaha shidaalka ee loogu talagalay Rukhsadlaha ama qandaraaslaha.

## Qodobk 65aad
## La noqosho

(1) Hadii ay dhacdo arimo khatara ama xad-gudub soo noqnoqday oo lagu sameeyey qodobada xeerkan iyo go'aanada dhaqangalka ah; rukhsadaha ama heshiiska Sahaminta iyo wadaagista soo saarsita, Wasiirku marka uu ka ansixiyo Golaha Wasiirada, waxaa uu go'aan ka qaadan karaa inuu gabi ahaanba ka noqdo heshiiska Sahaminta iyo wadaagida wax soo saarista ama wuu la noqondo rukhsada.

(2) Heshiiska sahaminta iyo wadaagida wax soo saarka ama rukhsada lala noqdo, kadib hadii rukhsadluhu ama qandaraasluhu uu kaco/la joojiyo, ama uu galo dayn ama dacwad kicid isla markaana rukhsad-layaasha kale ama qandaraaslayaal aanay awoodin inay la wareegaan inay ka qayb qaataan danahaas.

## Qodobka 66aad
## Tababarka

1. Rukhsadlaha ama qandaraasluha waa inay markay la tashadaan Wasiirka, diyaariyaan oo hirgeliyaana si waafaqsan xeer-hoosaadyada iyo shuruudaha rukhsada ama heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka, qorshayaasha iyo barnaamijyada loogu talagalay in lagu tababaro shaqaalaha Soomaliland ee dhamaan ka kooban qaybaha shaqada iyo dhamaan dhinacyada hawlaha shidaalka.

2. Rukhsadlaha ama qandaraasle waa inuu marka uu fulinayo hawlaha shidaalka, diyaariyaa, hirgeliyaana qorshayaal loogu wareejinayo wasaarada xirfada iyo aqoonta teknoolijiyada sare ee la xidhiidha hawalaha shidaalka, laakiin qodobkan looma fasiranayo/isticmaali karo in lagu curyaamiyo rukhsadlaha ama qandaraaslaha, si ay u xafidnaato loolanka/booska tartan ee hawlaha shidaalka lafalgala heer caalamiyeed ama looga baahan yahay, Wasiirku waa inuu qaado talaabooyin uu kaga hortegayo in aan loo adeegsan wareejinta farsamo, teknoolajiyad oo curyaamin ku keeni karta rukhsadlaha.

3. Rukhsadlaha ama qandaraaslaha waa inuu siiyaa shaqaalaha Dawladda tababaro shaqo sida ay dhigayaan xeer-nidaamiyayaasha.

## Qodobka 67aad
## Danta Dawladda

(1) Rukhsadlaha ama qandaraasle waa inuu si waafaqsan xeer-nidaamiyayaasha iyo shuruudaha heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ama rukhsada, hubiyaa in fursad la siiyey shaqaalaynta shaqaalaha Soomaliland ee leh khibrada loo baahan yahay ama shahaadooyinka heerarka kala duwan ee hawlaha.

(2) Rukhsadlaha ama qandaraasle waa in aanu ku hawlanaan dhaqan midab-takoor ku salaysan, jinsi, dhalasho ama shuruudaha jinsi ee adeegyada looga baahan yahay shaqaale.

(3) Qandaraasle ama rukhsadle waa inuu shaqaaleyaa shaqaale aan xirfad lahayn oo reer Soomaliland ah oo keliya, hadii aanu si kale sheegin mucaahado caalami ah ama xeerka heshiiska xeer-nidaamiye.

(4) Rukhsadlaha ama qandaraasle, waa inuu sida ugu suurtagalka ah si waafqsan xeer-nidaamiyayaasha iyo rukhsada ama heshiiska Sahaminta iyo wadaagista wax soo saarista, adeegsan karaa adeegyo wadani ah ama lagu sameeyay Soomaliland, lakinse waa inay adeegyada, agabka, xirfadaha muwaadiniinta

tayo ahaan la mid yihiin, alaabada iyo adeegyada kala duwan ee dibeda laga keeni lahaa, ama aanay khatar ku ahayn caafimaadka, amniga iyo xeerarka deegaanka.

**Qodobka 68aad**
**Shuruudaha shirkadaha**

Qandaraasle ama rukhsadle agab ee aan ku lamaanayn/tirsan Somaliland gudaheed waa inuu:

**(1)** Iska diiwaan geliyaa Soomaliland shirkad ahaan si ay uga fuliyaan hawl shidaal uun oo la xidhiidha heshiiska Sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ama rukhsad lagu siiyey sida ku cad xeerkan.Waana in shirkadaasi dhinac ka tahay heshiiska Sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ama rukhsad haysataa.

**(2)** Waa inuu u joogaa Somaliland wakiilka leh awood uu kaga fuliyo hawlo shidaal dalka gudihiisa isla markaana uu geli karo heshiis dhaqangal ah, isaga oo ka wakiil ah qandaraaslaha ama rukhsadlaha, shuruudaha oo faah-fahsan waxaa lagu qeexi karaa codsiga dheeraadka ah ee kayd qoraalada ama xeer-nidaamiyayaasha.

**(3)** Waa in wakiilku diiwaangeliyaa waraaqaha qoraalka ah ee hay'adu/shirkadu haysato ee leh heerka farsamo ee lagama maarmaanka ah, halbeegyada bedqabka caafimaadka iyo deegaanka iyo awood maaliyadeed oo ay ku fulinayso hawlaha shidaalka ee xuduuda gudaheeda iyo lakabka hoose ee bada Dawladda.

**(4)** Arinta la xidhiidha hawlahaas shidaal, waa inay uga furaan xisaab isla markaana ku ilaaliyaan bangiga hab cad oo uu aqbalay Wasiirku.

**(5)** Waa inaanay ku hawlanayn hawl musu-maasuq isla markaana hantideeda iyo xisaabeedkeedu si buuxda ugu daahfuran yihiin Wasiirka, la taliyayaashiisa iyo Hanti-dhowrka Guud.

**Qodobka 69aad**
**Nidaaminta kormeerka iyo Daboolida Kharashka**

**(1)** Wasiirku wuxuu awood u siin karaa sarkaal inuu kormeero, tijaabiyo, hanti-dhawro sida ugu haboon hawl kasta oo shidaal si loo xaqiijiyo hawlaha shidaalka in loo fuliyo si waafaqsan xeerka dhaqangalka ah, xeerkan iyo xeer-nidaamyada si waafaqsan shuruudaha iyo xaaladaha khuseeya rukhsada ama heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka.

(2) Qof kasta oo uu awood u siiyey Wasiirku sida ku cad faqrada (1aad) ee qaybtan xaq wuxuu u leeyahay wakhtiga macquulka u ah:.

a. Inuu galo goob kasta, qaab dhismeed, gaadiid, rakibaad, doon, markab, diyaarad, alaabo/adeegyo, xafiisyo ama dhismayaal uu isticimaalayo rukhsadle, ama qandaraasle hawlo shidaal wadaa;
b. Kormeeraa, tijaabiyaa, hanti-dhowraa, sida ugu haboon, shaqo, qalab,macluumaad, walxo, hawlo iyo buugag maaliyadeed ee xisaabeed, raad-raacyo, diiwaano rukhsadle ama qandaraasle la xidhiidha ama loo isticimaalay hawlaha shidaalkaas;
c. Ka qaadaa, meesha ka saaraa iyadoo looga golleeyaha lafagur ama tijaabo muunad uu leeyahay shidaal, biyo ama wal-xaha kale ee ka yimi ceelka;
d. Kormeeraa, kasoo saaraa halkaas, nuqulna ka sameeyaa waraaqo qoraal oo la xidhiidha hawlgalkaas iyo;
e. In uu sameeyo baadhida iyo weydiimaha sida ugu suurtogalka ah ee lagu hubinayo in qodobada xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaasha loo hogaansamay.

(3) Rukhsadle ama qandaraasle waa inuu siiyaa qof kasta oo uu awood u siiyey Wasiirku sida ku cad faqrada sare, dhamaan adeegyada macquulka ah ee uu u baahanyahay, si uu u guto hawshiisa, kana caawiyaa si ay ugu sahlanaato gudashada kormeerka mudaysan ee shaqada sida ku cad qodobkan.

(4) Xukuumadu waxay codsan kartaa in kharashaadka lagu hagayo kormeerka hawlaha shidaalka si waafaqsan qodobkan uu u daboolo rukhsadluhu ama qandaraasluhu ama dhinaca uu kormeerku ku waajihanyahay ama goobtuu ka dhacayo.

(5) **Xukuumadu** waxaa iyadoo xeer-nidaamiye cuskanaya uga dalban karaa qandaraaslaha iyo rukhsadlaha fulinaya hawlaha shidaalka kharashka maamul ee ku salaysan hawl sanadeedka ajuurada iyadoo xisaabinta ajuurada loo raacayo xeernidaamiye.

## QAYBTA 5AAD
## QODOBADA CIQAABTA

### Qodobka 70aad
### Ciqaabaha Xeerka Shiidaalka

Iyada oo waxba loo dhimayn Xeerka ka hortaga ku Takrifalka hantida Qaranka Iyo La dagaalanka Musuq-Maasuqa:

1. Qof kasta oo hor istaaga ama dhibaateeya ruqsadle ama qandaraasle guddanaya hawlaha shidaal ee ku xusan qodobada xeerkan, shaqaalihiisa ama cid uu u wakiishay si waafaqsan xeerka, isaga oo qandaraaslahaas ama ruqsadlahaasi

isticmaalaya xuquuq kasta, awood ama xoriyad uu ku helay ruqsadaas ganacsi waxa uu galay danbi waxaana lagu Ganaaxayaa xadi lacageed oo Somaliland shilin ah oo u dhiganta 5,000 US$ (Shan kun US Dolar) iyo xabsi sannad ah.ama waa laysugu darri karaa labada.

2. Qof kasta oo:-
   a) Hawlo shiidaal ka fuliya Guddaha Somaliland isaga oo aan ogolaanshiiyo ka haysan Wasaarada Tamarta iyo Macdanta
   b) Ka Sameeya Guddaha Somaliland Sahamin Shiidaal isaga oo aan haysan Ruqsad sahamineed
   c) Sameeya, isaga oon ruqsad u haysan, hawl kasta oo qabashadeedu ruqsad u baahantahay sida ku xusan Xeer-nidaamiyayaasha Xeerkan
   d) Waxa uu galay danbi waxaana lagu Ganaaxayaa xaddi lacageed Somaliland shilin ah oo u dhiganta 500,000 US$ (Shan boqol oo kun US Dolar) iyo Xabsi aan ka badnayn 10 sannadood kana yarayn 3 sannadood ama waa laysugu darri karaa labadaba.
3. Qof ka ay Maxakamadi ku hesho inuu galay danbiyada ku xusan farqadaha 1aad ama 2aad ee Qodobkan ee la xidhiidha shidaal ama wax soo saar shidaal, marka la mariyo ciqaabaha ku xusan farqadaha kala duwan ee Qodobkani sheegayo, waxay maxakamadu amraysaa:
   a. In dawladu La wareegto Shidaalka ama Wax soo Saarka shidaalka
   b. In qof kaasi Dawladda Siiyo qiimaha shidaalka ama wax soo saarka shidaalka e uu ku takri falay.
4. Cid kasta oo hawlo shidaal u sameeya si baal marsan Sharcigan iyo xeer-nidaayiyaashiisa waxa uu galay denbi, waxaana lagu ganaaxayaa xaddi lacageed oo Somaliland shilin ah oo u dhiganta 50,000 US$ (konton kun US Dolar) ama xabsi aan ka yarayn hal sanno, kana badnayn saddex sanno ama labadaba waa laysugu dari karaa.
5. Cid kasta oo sameeya qorshe wax soosaar u diyaarin goobeed iyo hawlgelin isagoo aan ogolaansho ka haysan Wasaaradda waxa uu galay denbi, waxaana lagu ganaaxaya xaddi lacageed oo Somaliland shilin ah oo u dhiganta 1,000,000 US$ (Hal milyan US Dolar). Mudada uu hawlgalku socdona waxa uu bixinyaa xaddi lacageed oo Somaliland shilin ah oo u dhiganta 200,000 US$ (laba boqol kun US Dolar) maalin walba oo hawgalka aan la ansixini uu sii socdoba.
6. Cid kasta oo aan u soo gudbin qorshaha xidhitaanka goobta sida uu dhigayo qodobka 40aad waxa uu galay denbi, waxaana lagu ganaaxaya xaddi lacageed oo Somaliland shilin ah oo u dhiganta 50,000 US$ (konton Kun US Dolar) maalin walba oo ka bilaabata dhamaadka mudada ay ahayd in lagu soo gudbiyo qorshaha xidhitaanka goobta.
7. Cid kasta oo ku guuldaraysta bixinta macluumaadka/xogta sida uu Sharcigani u waajibinayo waxa uu galay denbi, waxaana lagu ganaaxaya xaddi lacageed oo Somaliland shilin ah oo u dhiganta 20,000 US$ (labaatan kun US Dolar). Waxaa kale oo uu bixinayaa xaddi lacageed oo Somaliland shilin ah oo u dhiganta 2,000 US$ (laba kun US Dolar) maalin kasta oo macluumaadka/xogtaasi aan la bixin.

8. Denbiyada uu shakhsi galo isaga/iyada oo wakiil ka ah shirkad ganacsi ama hay'ad sharciyaysan, ganaaxyada iyo xukunka ka yimaada denbiyadaas waxa lagu soo rogayaa shirkaddaa ganacsi ama hay'adaa iyo/ama guddigeeda fulinta.
9. Denbiyada ay gasho shirkad ganacsi ama hay'ad sharciyaysan, waxaa loo aqoonsanayaa inuu dembigaa galay agaasimaha ama qofka maamula shirkaddaa ganacsi ama hay'adaa, ilaa haddii mooyee
   a) Qofkaasi sameeyey taxadar ah in aan dembigaasi dhicin
   b) Dembiga la sameeyey aanu ogayn, ogolaan ama aanu qofkaasi door ku lahayn

## Qodobka 71aad
## Xeer-nidaamiyayaal Guud

Wasiirku wuxuu soo saari karaa xeer-nidaamiye qeexaya dhamaan arimaha xeerkani uu waajibiyay, inay ku haboon-tahay, daruuri tahay ama ogolaaday in laga soo saaro si loo fuliyo ama si buuxda loo dhaqan galiyo xeerkan.

## Qodobka 72aad
## Tilmaamid khaas ah

Iyadoon lagu xadgubayn guud ahaanshaha Qodobkan 71aad, Wasiirku wuxuu soo saari karaa xeer-nidaamiyayaal la xidhiidha:

**1.** hubinta dhisme bedqaba, dayac tirka iyo hawlaha rakibida iyo adeegayda loo isticimaalayo hawlaha la xidhiidha shidaalka;

**2.** Amniga, caafimaadka iyo daryeelka shaqaalaha hawlaha shidaalka iyo guud ahaan talaaboyinka amni ee lagama maarmaanka ah;

**3.** Ka hortaga wasakhawga iyo ka qaadida talaabada lagu hagaajinayo ee la xidhiidha wasakhow kasta oo ka dhici kara goobaha shidaalka;

**4.** Kormeerka goobaha hawlaha shidaalka laga fuliyo iyo agab kasta, wershad, mishiin iyo agabka e ku guda jira goobahaas;

**5.** Warbixinta iyo baadhista shilalka ka dhasha hawlaha shidaalka;

**6.** Ilaalinta, kormeerka iyo raad-raaca, xisaabaadka, tiro koobka iyo qorshayaasha la xidhiidha hawlaha shidaalka,

**7.** Dhamaadka qaybaha goobaha heshiiska ee waafaqsan heshiiska Sahaminta iyo wadaagista wax soo saarista;

8. illaalinta xuquuqaha daaqa, kaluunka, hawlaha dhaqaale iyo kuwa aan ahayn dhaqaalaha ee laga fuliyey gudaha ama goob kasta o u dhow goobaha hawlaha shidaalka laga fulinayo;

9. samaynta iyo soo gudbinta warbixinta, faa'iidooyinka iyo barnaamijyada;

10. hawlaha dhaqdhaqaaqa gaadiidka;

11. cadadka ajuurada iyo xuquuqaha lagu bixinayo hawlaha shidaalka, hababka isugeynta ajuurada iyo xuquuqaha gaar ahaaneed iyo hababka iyo wakhtiyda lacag bixinta halkaas;

12. khariidada tixraaca ee baloogyada iyo hagayaasha ee tirida baloogyada ugu sareeya ee uu haysan karo qandaraasle leh, rukhsad ama heshiiska Sahaminta iyo wadaagista waxa soo saarka;

13. habraacyada codsidyada heshiiska Sahaminta iyo wadaagista waxa soo saarka;

14. go'aaminta qiimaha shidaalka;

15. waajibinta in rukhsadle kasta iyo qandaraasle kasta usoo gudbiyo wasiirka barnaamijkooda maalgalineed;

16. Xafidaada khayraadka dabiiciga ah iyo ka ilaalinta wasakhda degaanka, ha ahaato mid shidaal ama mid kale.

17. hababka xisaabaadka ee la raacayo iyo warbixinada ku saabsan hawlaha shidaalka;

18. xaaladaha ugu yare e ay ku shaqayn karaan shaqaalaha ku hawlan hawlaha shidaalka;

19. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha laga wada hadli karo iyo kuwa aan laga wada hadli Karin ee heshiiska Sahaminta iyo wadaagista waxa soo saarka ee xeerkani dhigayo;

20. Qiimaha iyo hababka go'aaminta qiimaha ee shidaalka iyo biyaha ee laga soo saari karo ceel ama kayd shidaal si waafaqsan ogolaanshaha wax soo saarka;

21. Hababka la isiticimaalayo ee ku saabsan cabirka shidaalka, biyaha iyo wal-xaha kale ee laga soo saaro ceelasha iyo cabiraadaha kale ee qiimaha isugaynta iyo ujeedooyinka qiimaynta;

22. Cabirka cadaadista ee ku jira gudaha ama dib u cadaadiska, kaydka shidaalka ee goobta la isiticaamlayo iyo dib ugu shubida shidaalka;

23. Goobaha cayiman ee adeegsiga xuquuqaha ee rukhsadle ama qandaraasle sida ku cad xeerkan si loo fuliyo hawlaha shidaalka waa in la xadeeyaa;

24. Codsi ku saabsan bixinta iyo ogolaanshaha ceel qodista;

25. Hawlaha qodista iyo calamadaynta ceelasha iyo godadka ceelasha;

26. Hawlaha Baadhida iyo Sahaminta iyo fulinta shaqada la xidhiidha ujeedooyinkaas;

27. Hawlaha so saarista iyo fulinta shaqada ee arintaas;

28. Qaabka canshuuraha ee dhuumaha, adeega kaydka xaqa dhinaca sadexaad ee adeegyada;

29. Samaynta, xafidida iyo xaalada xudunta u ah awodaha, jarista, muunada iyo agabka kale ee laga helay hawlaha shidaalka;

30. Tijaabinta nooc kasta oo ku saabsan shidaalka;

31. Warbixinta iyo adeegsiga loogu talagaly ogolaanshaha qiiqa ama uumiga qabow;

32. Dhamaadka hawlaha shidaalka, kala saarida agabka iyo dejinta dakhliga kala saarida.

33. Ganaaxyada dembiyada ka dhanka ah xeer-nidaaamyaha.

## Qodobka 73aad
## Nasakhaad

Xeerkani waxa uu wuxuu lalayaa dhamaan xeerarkii ka horeeyay ee Shidaalka iyo wixii la halmaala.

## Qodobka 74aad
## Dhaqangalka Xeerka

Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa marka ay Golayaasha xeer-dejintu ansixiyaan Madaxwaynuhuna saxeexo ee lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

**c/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee G/Wakiillada JSL**

**Md. Axmed-yasin sh.cali Ayaanle**
**K/S Guddoomiyaha Golaha Wakiilada**